Ogaysiiska waxbarashada Khaaska ah Hanaanka dhowridda Ardayda iyo Qoysaskooda

Shuruudaha ay dhigayso Qaybta B Xeerka Waxbarashada Dadka Naafada ah (Individuals with Disabilities Education Act), Qawaaniinta Federaaliga (Federal Regulations), iyo Shuruucda Gobolka Xukuma Waxbarashada Khaaska ah (State Rules Governing Special Education)

Dib loo eegay Febraayo 2019

Glenna Gallo, M.S., M.B.A.
Caawiyaha Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Gaarka ee OSPI

Diyaariyey:

- Waxbarashada Khaaska ah
speced@k12.wa.us | 360-725-6075

JADWALKA MAWDUUCYADA

Xogta Guud 5
Hordhac 5
Yuu ku Socdaa Ogaysiisku 5
Wixii Xog Dheeraada ah 5
Ogaysiiska Hanaanka dhowrida 6
Ogaysiiska Hore ee Qoran 6
Afka Hooyo 7
Fariin Elektarooniya 7
Ogolaanshaha Waalidka--Qeexid 8
Ogolaanshaha Waalidka – Shuruudaha 8
Ogolaanshaha Qiimaynta Hore 8
Sharciga Khaaska ah ee Qiimaynta Hore Degmooyinka Gobolka 9
Adeegyada Hore ee Ogolaanshaha Waalidka iyo Dib uga Noqoshada Ogolaanshaha Adeegyada sii Socda 9
Ogolaanshaha Waalidka ee Dib u Qiimaynta 11
Warqadaha Xogaha ee Dedaalka Macquulka ah si loo Helo Ogolaanshaha Waalidka 11
Xogta Kale ee Ogolaanshaha 11
Qiimaynta Waxbarasho ee Madaxa Banaan 12
Qeexdimaha 12
Xuquuqda Waalidku u Leeyahay IEE ee Kharashka Dadwaynuhu Bixinayo 12
Qiimaynta ay Waalidku Bilaabeen 13
Codsiyada Qiimaynta ee Xaakinada Sharciga Maamuleed (Administrative Law Judges, ALJ) 13
Shardiga Degmada 13
Qeexitaanada Qarsoodiga Xogta 13
Qofka lagu Aqoonsan Karo 14
Ogaysiis ku socda Waalidka 14
Xuquuqda Helitaanka 15
Helitaanka Diiwaanka 15
Diiwaanka in ka Badan Hal Ilmo 16
Liiska Noocyada iyo Goobaha Xogta 16
Khidmadaha 16
Wax kaga Beddelka Diiwaanada Codsiga Waalidka 16
Fursad Dhageysi, Nidaam Dhageysi, iyo Natiijooyinka Dhageysiyada 16
Ogolaanshaha Shaacinta Xogta Qofka Lagu Aqoonsan Karo 17
Dhowrida Xogta Qofka Lagu Aqoonsan Karo 17
Burburinta, Haynta, iyo Keydinta Xogta 18
Hanaanka Xalinta Khilaafka Waxbarashada Khaaska ah 18
Dhexdhexaadin 18
Guud 19
Eex La'aanta Dhexdhexaadiyaha 19

Heshiiska lagu Gaadhay Dhexdhexaadin 19
Faraqa u Dhexeeya Baadhitaanada Cabashada Muwaadinka Waxbarashada Khaaska iyo Hannaanka Dhageysiga Xaqsoorka 20
Hanaanka Cabashada Muwaadinka 20
Cabasho Gudbinta 21
Baadhitaanada Cabashada 21
Baadhitaan, Balaadhin, Go'aan Qoran 21
Xalinta Cabashada 22
Cabashada Muwaadinka Waxbarashada Khaaska ah iyo Hanaanka Dhageysiga Xaqsoorka 22
Hanaanka Loo Marayo Dhageysiga Xaqsoorka 22
Guud 23
Soo Gudbinaya 23
Ogaysiika loo Baahanyahay ka Hor Dhegaysiga ee Codsiga Hanaanka Dhageysiga Xaqsoorka 24
Ku Filaanta Codsiga Dhageysiga 24
Wax ka Beddelka Codsiga Dhageysiga 24
Jawaabta Degmada ee Codsiga Hanaanka Dhageysiga Xaqsoorka 24
Jawaabta Dhinaca Kale ee Codsiga Hanaanka Dhageysiga Xaqsoorka 25
Qaabka Noocyada 25
Meelaynta Ardayga Marka Hanaanka Dhageysiga Xaqsoorka la Sugayo 25
Hanaanka Xalinta 26
Kulanka Xalka 26
Mudada Xalka 27
Ku Hagaajinta Wakhtiga Muddada 30-ka Maalmood ah 28
Heshiishka Xalka oo Qoran 28
Mudada Dib U eegidda Heshiiska 28
Hanaanka Dhageysiga Xaqsoorka ee Dhexdhexaadka ah 28
Guud 28
Xaakimka Sharci Maamuleed (ALJ) 29
Mowduuca Hanaanka Dhageysiga Xaqsoorka 29
Wakhtiga Codsashada Dhageysi 29
Ka reebenayaalka Wakhtiga 29
Xuquuqda Dhageysiga 30
Guud 30
Shaacinta Dheeraadka ah ee Xogta 30
Xuquuqda Waalidka ee Dhageysiga 30
Wakhtiga iyo Habboonida Dhageysiga 30
Go'aanka Dhageysiga 31
Go'aanka ALJ 31
Qodobka Dhismaha 31
Codsi ka gaara Hanaanka Dhageysiga Xaqsoorka 31
Natiijooyinka iyo Go'aanka ku socda Gudida la Talinta iyo Dadwaynaha 31
Gebagebada Go'aanka; Rafcaan 32

Xuquuqda Dadweynaha, oo lagu Darayo Mudada La soo Gudbinayo Dacwadahaas 32
Guud 32
Xadidida Wakhtiga 32
Hanaan Dheeraada 32
Sharciga Dhismaha 33
Kharashaadka Garyaqaanka 33
Guud 33
Bixinta Kharashka 34
Hanaanka Edaabeed ee Ardayda Ku Haboon Waxbarashada Khaaska ah 35
Masuuliyada Shaqaalaha Dugsiga 35
Go'aanka Kiis- Kiis 35
Guud 35
Masuuliyad Dheeraada 36
Adeegyada 36
Bedelka Meelaynta ay Sabab u tahay Ku Saarid Edaab Darteed 37
Ogaysiin 37
Go'aanka Caddaynta 37
Go'aanka in Dhaqanku uu u ahaa Caddayn Naafanimada Ardayga 38
Duruufo Gaara 38
Qeexdimaha 38
Go'aanka Meesha 39
Hanaanka Dhageysiga Xaqsoorka ee Edaabta 39
Masuuliyada Xaakimka Sharci Maamuleed (ALJ) 39
Meelaynta Inta Lagu Guda Jiro Hanaanka Dhageysiga Xaqsoorka ee la Dedajiyey 40
Ilaalinta Ardayda aan Weli ku Habboonayn Waxbarashada khaaska ah iyo Adeegyada la Xidhiidha 40
Guud 41
Asaaska Aqoonta Xaaladaha Edaabeed 41
Ka reeban 41
Xaaladaha ku habboon Haddii aanay Jirin Asaas Aqooneed 41
U Gudbinta iyo Ficilka Masuuliyiinta Sharci Fulinta iyo Caddaaladda 42
Gudbinta Diiwaanka 42
Shuruudaha Meelaynta Hal Dhinac ah ee Waalidka Ardayda Dugsiyada Gaarka ah ee Kharashka Dadwaynuhu Bixinayo 42
Magdhowga Meelaynta Dugsiga Gaarka ah 42
Xadidida Magdhowga 43
Ilaha 44

Xogta Guud

Hordhac

Xeerka Waxbarashada Shakhsiyaadka Naafada ah (Individuals with Disabilities Education Act, IDEA) ee 2004, ee quseeya waxbarashada ardayda naafada ah waxay u baahanyahay dugsiyadu in ay ku siiyaan, waalidka ardayga naafada ah, ama naafanimo looga shakisanyahay, ogaysiis ka kooban sharax buuxa oo ah xaquuqda aad leedahay ee sida ay dhigayso xeerka IDEA iyo qawaaniinta Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka. Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadwaynaha (Office of Superintendent of Public Instruction, OSPI) waxa uu dusha ka eegaa sharciyada Gobol oo xukuma bixinta waxbarashada khaaska ah. Sharciyada waxaa laga helaa Cutubka 392-172A Xeerka Maamuleed ee Washington (WAC). Xogtani waxay u hogaansantahay Waaxda Waxbarashada Maraykanka Ogaysiiskeeda Hanaanka Nuqulka Dhowrida, ee dib loo eegay Juun 2009.

Yuu ku Socdaa Ogaysiisku

Ogaysiiskan waxa uu ku socdaa waalidka, waalidk ku simaha, iyo ardayga wayn. Tixraaca ah “adiga” iyo “ilmahaaga” sidoo kale waxaa loo adeegsan karaa waalid ku simaha iyo ardayga wayn. Tixraacyada ogaysiiskan ee ku socda “dugsiga degmada” ama “degmada” waxa ku jira dugsiyada bulsho iskeed u samayso, iyo wakaaladaha kale ee dadwaynaha, sida adeega waxbarashada ee degmooyinka iyo wakaaladaha adeega waxbarasho.

Wixii Xog Dheeraada ah

Xog dheeraada oo ku saabsan adeegyada waxbarashada khaaska ah iyo habka dhowridda waxaa laga heli karaa adoo la xidhdiidhaya maamulaha waxbarashada khaaska ah ee dugsiga degmadaada, goobta tababarka waalidka iyo xogta ee gobolka, Shuraakada Codka Falka ee Awoodsiinta (Partnerships for Action Voices for Empowerment (Washington Pave)), ama adoo la soo xidhiidhaya OSPI. OSPI wuxuu joogteeyaa web beyj wax ka qabanaya waxbarashada gaarka ah ee Xafiiska Kormeeraha Guud Waxbarashada Dadweynaha (Office of Superintendent of Public Instruction) - Waxbarashada Khaaska ah . OSPI waxay leedahay kormeerayaal iyo sarkaalka qaabilsan xidhiidhka waxbarashada waalidka iyo bulshada si uu kaaga caawiyo su’aalaha ku saabsan barnaamijka waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga. Waxaad kala xidhiidh kartaa OSPI, Waxbarashada Khaaska lambarkan (360-725-6075) OSPI TTY 360-664-3631, ama speced@k12.wa.us.

Ogaysiiska Hanaanka dhowrida
34 CFR §300.504; WAC 392-172A-05015

Nuqul kamida baraarujinta waa in lagu siiyaa adiga (1) mar sanad dugsiyeed kasta, iyo: (2) gudbintaada hore ama codsigaaga qiimaynta; (3) markay degmadu hesho cabashadaada u horaysa ee muwaadinka waxbarashada khaaska ah gudaha sanad dugsiyeedka; (4) markay degmadu hesho codsigaaga u horreeya ee hanaanka dhageysiga xaqsoorka sanad dugsiyeedka gudahiisa; (5) marka go'aan laga gaadho in la qaado talaabo edbin ah taas oo ka dhigan bedel ama meelayn; **iyo**, (6) ku salaysan codsigaaga.

Ogaysiiskan habka dhowrida waxa ka midda sharaxaad buuxda oo ah dhamaan habka dhowrida ee la xidhiidha ku meelaynta ilmahaaga dugsiga gaarka ah laguna bixinayo lacagta kharashka dadwaynaha, hanaanka cabashada ee muwaadinka waxbarashada khaaska ah, ogolaanshaha ku salaysan ogaansho, hanaanka dhowrida ku qoran shuruucda Faraca E ee Qaybta B IDEA, iyo qarsoodinimada qodobada macluumaadka ee ku qoran Faraca F ee shuruucda Qaybta B IDEA. Degmadu waxay dooraan kartaa in ay u isticmaasho ogaysiiskan ama ay ku kobciso ogaysiiska hanaanka dhowrida ku socda waalidka.

Ogaysiiska Hore ee Qoran
34 CFR §300.503; WAC 392-172A-05010

Dugsiga degmadaadu waa in uu ku siiyaa xogta qoran oo ku saabsan go'aamada muhiimka ah ee saameeya barnaamijka waxbarashada khaaska ah ee ilmahaaga. Tan waxaa loogu yeedhaa ogaysiiska hore ee qoran waana xog qoran oo muujinaysa go'aanada lagu gaadhay kulanka ama degmada iyagoo kaga jawaabaya codsi aad samaysay. **Degmada waxaa looga baahanyahay in ay kuu soo dirto adiga ogaysiiska hore ee qoran marka go'aanka la gaadho, laakiin ka hor intaan go'aanka la fulin.** Kuwani waa go'aano la xidhiidha talo bixinaha ama diidmooyinka in la bilaabo ama la bedelo aqoonsiga, qiimaynta, meelaynta, ama siinta ilmahaaga FAPE.

Ogaysiika qoran ee hore waa in ay ku jiraan:

- Waxa degmadu ku talo bixinayso ama ay diidayso;
- Sharaxa sababata degmadu ugu talo bixinayso ama ku diidayso in ay talaabo qaado;
- Faahfaahin wixii doorashooyina ee ay ka fekereen kooxda IEP iyo sababaha loo diiday;
- Faahfaahinta hanaanka qiimayn kasta, qiimayn, diiwaan, ama warbixin loo isticmaalay aasaaska talaabada;
- Faahfaahinta asbaabo kale oo la xidhiidha falka;
- Faahfaahin qiimayn kasta oo hanaanka degmadu ku talo bixiyay in lagu fuliyo qiimaynta hore iyo wixii kasta ee dib u qiimayna;
- Warbixinta in waalidka lagu ilaaliyay hanaanka dhowrida lagu faahfaahiyay buug-yaraha;
- Sida aad ku heli karto nuqul ogaysiiskaan buug-yaraha hanaanka dhowrida; ama ku dar nuqulka ogaysiiskan hanaanka dhowrida buug-yaraha haddii aan mid lagu siin; **iyo**,

- Ilaha ama meelaha aad la xidhiidhayso si aad caawimo uga hesho fahanka hanaanada dhowrida ama ilaalinta.

Tusaalooyinka marka aad heli doonto ogaysiiska hore ee qoran waa:

- Degmadu waxay doonaysaa in ay qiimayso ama dib u qiimayso ilmahaaga, ama degmadu waxay diidaysaa in ay qiimayso ama dib u qiimayso ilmahaaga.
- Ilmahaaga IEP giisa ama meelaynta ayaa la bedelayaa.
- Waxaad waydiisatay bedel oo degmaduna way diidaysaa in ay samayso bedelka.
- Waxaad siisay degmada ogaysiis qoran in aad dib ula noqonayso ogolaanshaha ilmahaagu in uu helo adeegyada waxbarashada khaaska ah.

Ogaysiiska hore ee qoran waa inuu ku qoranyahay luqad ay fahmi karaan dadwaynuhu oo lagugu siiyo afka hooyo ama hab kale oo la isku af garto oo aad isticmaasho, iyadoo aan si cad u ahayn suuragal in si fudud loo sameeyo mooyee. Haddii luqadaada hooyo ama hababka kale ee isgaadhsiintu aaney aheyn luqad qoran, degmadu waa iney qaadaa talaabooyin ay ku hubinayso in: (1) ogaysiiska lagu turjumay af ahaan ama siyaabo kale oo luqadaada hooyo ah ama hab kale oo la isku af garto; (2) aad fahanto waxa uu ka koobanyahay ogaysiisku, iyo (3) uu jiro cadayn qoran in shuruudaha sida ay dhigayaan (1) iyo (2) la buuxiyay.

Afka Hooyo
34 CFR §300.29; WAC 392-172A-01120

Afka hooyo, marka la isticmaalo iyadoo qusaysa qofka leh Xirfada luqada Ingiriisiga oo xadidan, macnaheedu waa:

1. Luqada uu qofkaasi isticmaalo caadi ahaan, ama, xaalada ilmaha, luqada caadi ahaan ay isticmaalaan waalidka ilmuhu.
2. Dhamaan xidhiidhka tooska ah ee ilmaha (oo ay ku jirto qiimaynta ilmuhu), luqada uu caadi ahaan ilmuhu ku isticmaalo guriga ama deegaanka uu wax ku barto.

Qofka dhegoolaha ah ma indhoolaha, ama qofka aan lahayn luqad qoran, habka la isku afgartaa waa waxa uu caadi ahaan qofku isticmaalo (habka dhegooluhu isku afgarto, habka indhooluhu wax u akhriyo, ama ku xidhiidhka afka).

Fariin Elektarooniya
34 CFR §300.505; WAC 392-172A-05020

Haddii ay degmadaadu siiso waalidka doorashada in ay xogta warqadaha ku helaan iimayl, waxaad dooran kartaa in aad ku hesho tan soo socota iimayl ahaan:

1. Ogaysiiska hore ee qoran;
2. Ogaysiiska habka dhowrida; iyo,
3. Ogaysiiska la xidhiidha codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka.

Ogolaanshaha Waalidka--Qeexid
34 CFR §300.9; WAC 392-172A-01040

Ogolaansho micnaheedu waa:

1. Waxa si buuxda luguugu war geliyay afkaaga hooyo ama qaab kale oo la isku af garto (sida qaabka dhegooluhu u hadlo, habka indhooluhu wax u akhriyo ama ku xidhiidhka afka) dhamaan xogta qusaysa talaabada aad ka bixinayso ogolaanshaha;
2. Waad fahantay oo ku waafaqday qoraal talaabadaas, oo ogolaashahu waxa uu faahfaahinayaa talaabadaas iyo waxaanu taxayaa diiwaanada (haddii ay jiraan wax) la baahin doono iyo cidda loo baahinayo: iyo,
3. Waxaad fahantay in ogolaanshahu aanu ahayn mid khasab ah dhankaaga waxaanad ka noqon kartaa (iska dhaafi kartaa) ogolaanshahaaga wakhtigaad doonto.

Haddii aad jeceshahay in aad ka noqoto ogolaanshaha ka dib marka ilmahaagu bilaabay helitaanka adeegyada waxbarashada khaaska ah, waa in aad taas ku sheegtaa qoraal. Ka noqoshadaada ogolaanshahu ka ma hor imanayo (ma burinayo) fal bilaabmay ka dib markaad aad bixisay ogolaanshahaaga iyo kahor markaad ka noqotayba. Taa waxa raaca, degmada dugsiga loogama baahna in ay dib u hagaajin ku sameeyan (bedel) diiwaanka waxbarashada ee ilmahaaga si ay uga suuliyaan wixii ticraac ah ee helida adeegyada waxbarashada khaaska ah ee ilmahaaga.

Ogolaanshaha Waalidka – Shuruudaha
34 CFR §300.300; WAC 392-172A-03000

Ogolaanshaha Qiimaynta Hore

Degmadaadu ma fulin karto qiimaynta hore ee ilmahaaga si ay go'aan uga gaadho xaq u lahaanshaha waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha ilaa ay ku siiso ogaysiiska hore ee qoran oo faahfaahinaaya waxqabadayada qiimaynta lagu talo bixiyay oo ay helaan ogolaanshahaaga, qoran ee ogaanshaha ku salaysan. Degmaadu waa in ay samaysaa dedaal macquul ah si ay u hesho ogolaanshahaaga ogaanshaha ku salaysan ee qiimaynta hore ah si ay go'aan uga gaadhaan haddii uu ilmahaagu xaq u leeyahay waxbarashada khaaska ah.

Ogolaanshahaagu qiimaynta hore ahi uma jeedo in aad siisay degmada ogolaanshahaagii si ay u bilaabaan siinta ilmahaaga waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha. Dugsiga degmadu sidoo kale waa in uu adiga kaa helaa ogolaansho in la siiyo ilmahaaga waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha marka ugu horaysa.

Haddii uu ilmahaagu ka diiwaangashan yahay dugsiga dadwaynaha ama aad raadinayso in aad ka diiwaangeliso dugsiga dadwaynaha oo aad diiday in aad bixiso ogolaanshaha, ama aad ku fashilantay inaad ka jawaabto codsi ah inaad bixiso ogolaansho qiimaynta hore,

degmadadaa **laga yaabaa**, laakiin loogama baahna eh, in ay isku daydo inay ku hesho ogolaanshahaaga iyadoo adeegsanaysa dhexdhexaadin ama hanaanka dhegaysiga xaqsoorka, sida halkan ka dib lagu faahfaahiyay ogaysiiskan. Degmadaadu kuma xadgudbi doonto waajibaadkeeda inay hesho, cadayso, oo qiimayso ilmahaaga haddii ay doorato in aanay sii wadin qiimaynta ilmahaaga gudaha duruuftan.

Sharciga Khaaska ah ee Qiimaynta Hore Degmooyinka Gobolka

Haddii ilmahaagu yaalo meel ku meel gaadha oo lagu xanaaneeyo oo aanu kula noolayn adiga, dugsiga degmadu uma baahna ogolaanshahaaaga qiimaynta hore si ay go'aan uga gaadhaan haddii ilmahaagu uu xaq u leeyahay waxbarashada khaaska ah haddii:

1. In kastoo dedaal badan oo macquul ah la sameeyay, degmadu kuma heli karto;
2. Xuquudaada waalidnimo waa la tirtiray iyadoo waafaqsan sharciga gobolka; **ama,**
3. Xaakimku waxa uu u xilsaaray xaq in uu gaadho go'aano waxbarasho qof aan adiga ahayni oo qofkaas ayaana bixiyay ogolaanshaha qiimaynta hore.

Xanaanaynta ilmaha ee gobolka, sida ku jirta IDEA, waa ilmaha kaas oo ah:

1. Ilmaha xanaanada ku meel gaadhka ah oo aan loo gayn waalid koriya;
2. Looga fekeray xanaanaynta gobolka sida uu dhigayo sharciga Gobolka Washington; **ama**,
3. Haynta Waaxda Adeegyada Bulshada iyo caafimaadka ama gobol kale wakaaladiisa daryeelka carruurta.

Xanaanaynta ilmaha ee gobolka kuma jiro ilmaha la korinayo kaas oo leh waalid koriya.

Adeegyada Hore ee Ogolaanshaha Waalidka iyo Dib uga Noqoshada Ogolaanshaha Adeegyada sii Socda

Degmadaadu waa in ay samayso dedaad macquula si ay u hesho ogolaanshahaaga qoran oo waa in ay heshaa ogolaanshahaaga ogaanshaha ku salaysan ka hor intaanay siin ilmahaaga waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha wakhtiga ugu horeeya.

Haddaanad u jawaabin codsiga si aad u bixiso ogolaanshaha ilmahaagu in uu helo waxbarasho khaasa iyo adeegyada la xidhiidha wakhtiga ugu horeeya, ama haddii aad diido in aad bixiso ogolaanshaha sidaas ah, degmadaadu laga yaabaa inayna adeegsan hanaan dhexdhexaadin ah si ay isugu daydo in ay hesho heshiis ama ay adeegsato hanaanka dhageysiga xaqsoorka si ay uga hesho xukun xaakimka maamulka sharciyeed si loo siiyo ilmahaaga waxbarasho khaas ah iyo adeegyada la xidhiidha.

Haddii aad diido ama aanad ka jawaabin codsiga in aad bixiso ogolaanshahaaga ilmahaagu in uu helo waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha wakhtiga ugu horeeya, dugsiga degmadu lagama yaabo in uu siiyo ilmahaaga waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha. Xaaladana, dugsiga degmadaadu:

1. Maaha mid ku xadgudubaya shardiga in looga dhigo waxbarashada dadwaynaha oo lacag la'aana kuna habboon (free appropriate public education, FAPE) ilmahaagu inuu heli karo maadaama lagu guuldaraystay in la siiyo adeegyadan ilmahaaga; iyo,
2. Looma baahna in la yeesho kulan IEP ah ama loo soosaaro IEP ilmahaaga waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha awgeed kuwaas oo ogolaanshahooda la codsaday.

Markaad bixiso ogolaansho qoran ee ilmahaagu in uu helo waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha, oo ay degmadu bilowdo in ay siiso adeegyada waxbarashada khaaska ah, ilmahaagu wuxuu ahaan doonaa mid xaq u leh in uu helo adeegyada waxbarashada khaaska ah ilaa:

1. Isaga ama iyada dib loo qiimeeyo oo laga helo in aanay ku habboonayn heerka adeegyada waxbarashada khaaska ah;
2. Isaga ama iyadu uu ku qalanjebiyo dibloomada dugsiga sare ee caadiga ah;
3. Isaga ama iyadu ay gaadho da'da 21 (ama haddii ilmahaagu 21 jirsado ka dib 31 Ogosto, isaga ama iyadu waxay xaq u yeelanaysaa adeegyada ilaa dhamaadka sanad dugsiyeedka); ama,
4. Waxaad siisay degmada ka noqosho ogolaashahaagii oo qoran oo ah bixinta sii socota ee adeegyada waxbarashada khaaska ah.

Haddii aad dib uga noqoto ogolaanshahaagii qoraal bixinta sii socota ee adeegyada ka dib markay degmadu bilowday adeegyada waxbarashada khaaska ah, degmadu waa in ay ku siisaa *ogaysiiska hore oo qoran* wakhti macquula ka hor intaanay joojin siinta ilmahaaga adeegyada waxbarashada khaaska ah. Ogaysiiska hore ee qorani waxaa ku jiri doona taariikhda ay degmadu joojin doonto siinta ilmahaaga adeegyada waxaanay kugu wargelin doontaa in dugsiga degmadu:

1. Maaha mid ku xadgudubaya shardiga in looga dhigo waxbarashada dadwaynaha oo lacag la'aana kuna habboon (free appropriate public education, FAPE) ilmahaagu inuu heli karo maadaama lagu guuldaraystay in la siiyo adeegyadan ilmahaaga; iyo,
2. Looga baahnayn inay qabato kulan IEP ah ama loo soosaaro IEP ilmahaaga si waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha oo dheeraad ah loo siiyo.

Degmadu ma adeegsan doonto hanaan xaqsoor si ay ugu tirtirto ka noqoshadaada qoran ama ay adeegsato hanaan dhexdhexaadin ah si ay u hesho heshiiskaaga si ay u sii wado siinta ilmahaaga adeegyada khaaska ah ee waxbarashada. Ka dib markay degmadu joojiso siinta ilmahaaga adeegyada waxbarashada khaaska ah, ilmahaaga intaa wixii ka dambeeya xaq u yeelan maayo adeegyada waxbarashada khaaska ah waxaana qabanaya shuruudo la mid ah kuwa ku habboon ardaydoo dhan. Adiga ama kuwa kale ee yaqaan ilmahaaga, ooy ku jirto dugsiga degmada, waxa laga yaabaa in ay u gudbiyaan ilmaha qiimaynta hore wakhti kasta ka dib markaas dib uga noqoto ogolaanshahaagii ahaa in ilmahaagu helo waxbarasho khaas ah.

Ogolaanshaha Waalidka ee Dib u Qiimaynta

Haddii baadhitaan cusub la fulinayo oo qayb ka ah dib u qiimaynta ilmahaaga, degmadaadu waa in ay heshaa ogolaanshahaaga ogaanshaha ku salaysan ka hor inta aanay dib u qiimayn ilmahaaga, ilaa ay degmadaadu muujin karto in:

1. Ay qaaday talaabooyin macquula si ay u hesho ogolaanshaaga dib u qiimaynta ilmahaaga; iyo,
2. Aanad ka soo jawaabin.

Haddii aad diido in aad ogolaato baadhitaan cusub oo qaybka ka ah dib u qiimaynta ilmahaaga, degmadu waxa laga yaabaa, laakiin loogama baahna eh, in ay sii wado dib u qiimaynta ilmahaaga iyadoo adeegsanaysa nidaamka dhexdhexaadinta si ay heshiis kuula gaadho ama waxay isticmaali hannaanka dhageysiga xaqsoorka si u masaxdo diidmadaada inaad oggolaato in ilmahaaga dib loo qiimeeyo. Marka la eego qiimaynta hore, degmadu kuma xadgudbayso waajibaadkeeda sida ay dhigayso Qaybta B ee IDEA haddii ay diido raadinta dib u qiimaynta iyadoo adeegsanaysa dhexdhexaadin ama hanaanka dhageysiga xaqsoorka.

Warqadaha Xogaha ee Dedaalka Macquulka ah si loo Helo Ogolaanshaha Waalidka

Dugsigaagu waa in uu hayaa cadaymaha dedaalka macquulka ah ee uu u galay si uu u helo ogolaanshahaaga qiimaynta hore, si ay u bixiyaan waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha wakhtiga ugu horaysa, si ay u fuliyaan dib u qiimayn taas oo ku lug leh baadhitaan cusub, iyo in meesha ay ku sugan yihiin ogaadaan waalidiinta carruurta uu gobolku xanaaneeyo si dib u qiimayn loogu sameeyo. Cadaymahan waa in ay ku jiraan diiwaanka isku dayada degmada ee meelahan, sida:

1. Diiwaan faahfaahsan oo telefoonadii la diray ama la isku deyay iyo natiijooyinjkii telfeoonadaas;
2. Nuqulada farriimaha lagu soo diray iyo wixii jawaabo la helay; iyo,
3. Diiwaan faahfaahsan oo ah booqashooyinkii lagu yimid gurigaaga ama shaqada iyo natiijooyinka booqashooyinkaas.

Xogta Kale ee Ogolaanshaha

Looma baahna ogolaanshahaaga intaanay degmadaadu:

1. Dib u eegin xogta jirta oo qayb ka ah qiimaynta ama dib u qiimaynta ilmahaaga; ama,
2. Siin ilmahaaga baadhitaan ama qiimayn kale oo la siiyo ardayda dhan ilaa, ka hor baadhitaankaas ama qiimayntaas la bixiyey mooyaane, ogolaanshahaa looga baahanyahay waalidka dhamaan ardayda.

Haddii aad ilmahaaga ka diiwaan gelisay dugsi khaasa adoo kharashka ka bixinaya ama haddii aad ilmahaaga guriga wax ku barayso, oo aanad bixin ogolaanshahaaga qiimaynta hore ee ilmahaaga ama dib u qiimaynta, ama aad ku guul daraysato in aad ka jawaabto

codsi inaad u bixiso ogolaanshahaaga, degmada lagama yaabo in ay u adeegsato hanaan dhexdhexaadin ah si ay u hesho ogolaanshahaaga ama adeegsato hanaanka dhageysiga xaqsoorka si loo tirtirto diidmadaada. Degmada loogama baahna in ay uga fekerto ilmahaaga sidii mid xaq u leh in uu helo adeegyada dugsiyada gaarka ah ee xaqa loo wada leeyahay, kuwaas oo ah adeegyo loo sahlay helida qaar ah ardayda dugsiyada gaarka ah waalidku-ku meeleeyay oo xaq u leh waxbarashada khaaska ah.

Qiimaynta Waxbarasho ee Madaxa Banaan
34 CFR §300.502; WAC 392-172A-05005

Waxaad xaq u leedahay helitaanka qiimaynta waxbarashada ee madaxa banaan (independent educational evaluation, IEE) ee ilmahaaga haddii aad khilaafto qiimaynta ay fuliyeen degmadaadu. Haddii aad codsato IEE, degmadu waa in ay ku siisaa xog ku saabsan meesha aad ka heli karto IEE iyo wax kusaabsan shardiga degmada qiimaynta ee ku habboon IEE da.

Qeexdimaha

- *Qiimaynta waxbarashada madaxa banaan* (IEE) macnaheedu waa qiimaynta uu fuliyo imtixaan qaade takhasus u leh oo aan u shaqayn degmada ka masuulka ah waxbarashada ilmahaaga.
- *Kharashka dadwaynaha* macnaheedu waa in mid uun ay degmadu wada bixiso kharashka qiimaynta ama ay hubiso in qiimaynta haddii kale lagugu siiyay bilaa lacag.

Xuquuqda Waalidku u Leeyahay IEE ee Kharashka Dadwaynuhu Bixinayo

Waxaad xaq u leedahay IEE da ilmahaaga ee kharashka dadwaynaha haddii aad khilaafto qiimaynta ilmahaaga ay degmadu fulinayso oo ku xidhan shuruudahan soo socda:

1. Haddii aad codsato IEE ilmahaaga oo kharashka dadwaynaha ah, dugsiga degmadaadu waa in, 15 maalmood gudahood oo codsigaaga ah, **mid uun:** (a)soo gudbisaa codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka si ay u muujiso in qiimayntooda ilmahaagu ay habboontahay ama in qiimaynta ilmahaagu ee aad heshay aanay buuxinayn heerka qiyaasta degmadu u dejisay; **ama,** (b) ku waafaqday in ay ku bixiso kharashka dadwaynaha IEE-ga.
2. Haddii dugsiga degmadaadu uu codsado hanaanka dhageysiga xaqsoorka oo go'aanka kama dambaysta ahi uu yahay in qiimaynta degmada ee ilmahaagu ay haboontahay, weli waxaad xaq u leedahay IEE, laakiin kuma helaysid kharashka dadwaynaha.
3. Haddii aad ilmahaaga u codsato IEE, waxa uu dugsiga degmadaadu ku waydiin karaa sababta aad u diiday qiimaynta ay fuliso degmadu. Si kastaba ha ahaatee, degmadu uma baahan karto sharaxaad oo si aan macquul ahayna uma daahin karto mid uun siinta IEE ee ilmahaaga ee kharashka dadwaynaha ama gudbin codsi hanaanka dhageysiga xaqsoorka si ay u difaacdo qiimaynta degmada ee ilmahaaga.

Waxaad xaq u leedahay mid IEE-da ah oo ilmahaaga ah oo kharashka uu yahay ka dadwaynaha wakhti kasta oo ay degmadu fuliso qiimaynta ilmahaaga kaas oo aad ku khilaaftay.

Qiimaynta ay Waalidku Bilaabeen

Haddaad hesho IEE ilmahaaga oo kharashka dadwaynaha ah ama aad siiso degmada IEE aad ku heshay kharash gaar ah:

1. Degmadaadu waa in ay kaga fekertaa natiijooyinka IEE go'aan kasta laga gaadho siinta FAPE ilmahaaga, haddii ay ku buuxiso heerka qiimaynta degmada ee IEE; iyo,
2. Adiga ama degmadaadu waxay ku soo bandhigi kartaa IEE cadayn ahaan hanaanka dhageysiga xaqsoorka ee quseeya ilmahaaga.

Codsiyada Qiimaynta ee Xaakinada Sharciga Maamuleed (Administrative Law Judges, ALJ)

Haddii ALJ codsato IEE-da ilmahaaga oo qayb ka ah hanaanka dhageysiga xaqsoorka, kharashka qiimaynta waa in uu noqdaa kharashka dadwaynaha.

Shardiga Degmada

Haddii kharashka IEE-da lagu bixinayo kharashka dadwaynaha, shardiga lagu helay qiimayntu, oo ay ku jirto goobta qiimaynta iyo takhasuska imtixaan qaadaha, waa in ay la mid ahaataa heerka ay degmadu ay isticmaasho marka ay bilaabayso (ilaa xadka shardiyadani ay ka waafaqsanyihiin xaqa aad u leedahay IEE).

Lag reebo sida kor lagu faahfaahiyay, degmadu kuguma xidhayso shuruudo ama jadwal la xidhiidha ku helitaanka IEE kharashka dadwaynaha.

Qeexitaanada Qarsoodiga Xogta
34 CFR §300.611; WAC 392-172A-05180

IDEA waxay ku siinaysaa xuquuqda qusaysa diiwaanka waxbarashada khaaska ah ee ilmahaaga. Xuquuqdani waa qaar lagu kordhiyay xuquuqda aad ku leedahay Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Gaar Ahaanshaha (Family Educational Rights and Privacy Act, FERPA), kaas oo ah sharci siiya dhamaan ardayda ilaalinta diiwaanka waxbarasho.

Sida lagu isticmaalay hoosta cinwaanka *Qarsoodiga Xogta*:

- *Burburinta* micnaheedu waxa weeye burburin muuqata ama ka saarida xogta waxyaabahii qofka lagu aqoonsan lahaa sidaas darteed xogta shakhsi ahaan lama aqoonsan karo.
- *Diiwaanka waxbarashada* micnaheedu waxa weeye nooca diiwaanka ku gedaaman qeexidda "diiwaanka waxbarashada" ee 34 CFR Qaybta 99 (shuruucda fulinaya Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Gaar Ahaanshaha 1974, 20 U.S.C. 1232g (FERPA)).
- *Wakaalada ka Qaybgalka* macnaheedu waxa weeye dugsi kastoo degmo, wakaalad ama hay'ad oo ururisa, haysa, ama isticmaasha xogta shakhsiga lagu aqoonsado, ama kaas oo xogta laga helay, sida ay dhigayso Qaybta B ama IDEA.

Qofka lagu Aqoonsan Karo
34 CFR §300.32; WAC 392-172A-01140

Shakhsiga lagu qoonsan karo macnaheedu waa xogta leh:

1. Magaca ilmahaaga, magacaaga waalid ahaan, ama magaca xubin kaloo qoyska ah;
2. Cinwaanka ilmahaaga;
3. Aqoonsi shakhsi, sida lambarka amniga bulshada ilmahaaga ama lambarka ardayga; **ama**,
4. Calaamado qoran oo shakhsi oo lagu garto ama xog kale taas oo suuragelin lahayd in lagu aqoonsado ilmahaaga hubsiimo macquula.

Ogaysiis ku socda Waalidka
34 CFR §300.612; WAC 392-172A-05185

OSPI waxay bixinaysaa ogaysiis, iyadoo maraysa shuruucdeeda, si ay si buuxda kuugu wargeliso wax ku saabsan qarsoodiga xogta aqoonsiga shakhsi ahaaneed, oo ay ku jirto:

1. Faahfaahinta xadiga kaas oo lagu bixiyay ogaysiiska luqada hooyo ee kooxaha mujtamaca kala duwan ee gudaha Washington;
2. Faahfaahinta carruurta xogta shakhsi ahaan lagu aqoonsado laga hayo, nooca xogta la baadi goobayo, qaababka Washington qorshaynayso in ay u adeegsato xog ururinta (iyadoo lagu darayo ilaha xogta laga soo ururiyay), iyo isticmaalka lagu samayn doono xogta;
3. Hanaanka iyo siyaasada kooban ee ay tahay in ay degmadu raacdo ee ku saabsan kaydinta, u muujinta dhinacyo saddexaad, haynta, iyo burburinta xogta shakhsiga lagu aqoonsan karo; **iyo**,
4. Faahfaahinta dhamaan xuquuqaha waalidka iyo ardayda ee quseeya xogtan, oo ay ku jirto xuquuqda sida uu dhigayo Xeerka Xuquuqda Qoyska iyo Gaar Ahaanshaha (FERPA) iyo shuruucdeeda fulinta ee 34 Qaybta 99.

Kahor wax aqoonsi muhiima oo gobolkoo dhan, goob, ama hawl qiimayn ah (sidoo kale loo yaqaan "helid ilmo") waa in ogaysiis lagu soo baahiyaa jaraa'idka ama ogaysiis laga bixiyaa saxaafada kale, ama labadaba, oo baahintu suuragalinaysa inay wargeliso waalidka

gobolkoo dhan ee wax qabadka lagu helayo goobta, aqoonsiga, iyo qiimaynta carruurta u baahan waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha.

Xuquuqda Helitaanka
34 CFR §300.613-617; WAC 392-172A-05190–05210

Waxaad xaq u leedahay in aad baadho oo dib u eegto diiwaanka waxbarashada ilmahaaga kuwaas oo la soo ururiyay, la hayay, ama uu isticmaalay dugsiga degmadaada ee ay dhigayso Qaybta B ee IDEA. Degmadu waa in ay u hogaansantaa codsigaaga baadhida iyo dib u eegida diiwaan kastoo waxbarasho oo ilmahaaga ah iyadoo aanu jirin daahin aan lama huraan ahayn ka hor kulan kasta oo ku saabsan IEP, ama wax hanaanka dhageysiga xaqsoorka oo dhexdhexaad ah (oo ay ku jirto kulan go'aan qaadasho ah ama hanaanka dhageysiga xaqsoorka waxbarashada khaaska ah oo quseeya edaabta), oo sinaba aan ka badnayn 45 maalmood ka dib markaad samaysay codsiga.

Xaqa aad u leedahay in aad baadho oo dib u eegto diiwaanka waxbarashada waxa ku jira:

1. Xaqaaqa jawaabta ka imanaysa degmada ee ku saabsan codsiyadaada macquulka ee sharaxaada iyo turjumaada diiwaanada;
2. Xaqaaqa in aad codsato in dugsiga degmadu ku siiyo nuqulo diiwaanka ah haddii aanad si wanaagsan u baadhi karin una samayn karayn dib u eegid adoo xaashiyahaa sawiran hela mooyee; **iyo,**
3. Xaqaaqa in wakiilkaagu uu baadho dibna u eego diiwaanada.

Degmadu waxay u haysan doontaa in aad leedahay masuuliyada in aad baadho dibna u eegto diiwaanada la xidhiidha ilmahaaga iyadoo lagu taliyo in aanad lahayn masuuliyadaas mooyee sida ay dhigayaan shuruucda ku habboon ee maamula arrimaha sida wakiilnimada, kala-tagga, iyo furriinka.

Helitaanka Diiwaanka

Dugsi kastoo degmo waa in u hayaa diiwaanada dhinacyada hela galaan galka diiwaanka waxbarashada la ururiyay, la hayay, ama la isticmaalay ee ay dhigayso Qaybta B ee IDEA, iyadoo uu ku jiro magaca dhinaca, taariikhda galaan galka la bixiyay, iyo ujeedada dhinaca loogu ogolaaday in ay isticmaalaan diiwaanka. Dugsiyada degmooyinka loogama baahna in ay hayaan diiwaanka galaan galka ee waalidka ama shaqaalaha loo ogolyahay dugsiga degmada.

Diiwaanka in ka Badan Hal Ilmo

Haddii diiwaan waxbarasho uu ku jirto xog in ka badan hal arday, waxaad xaq u leedahay baadhitaan iyo dib u eegid xogta keliya ee la xidhiidha ilmahaaga ama in lagugu wargeliyo wax ku saabsan xogta haddii ay degmadu ku tusi kari waydo xogtaas iyadoo aan muujin xogta shakhsiga lagu aqoonsado ee ku saabsan arday kale.

Liiska Noocyada iyo Goobaha Xogta

Haddii aad codsato, dugsiga degmadu waa in uu ku siiyaa liis noocyada iyo goobaha diiwaanka waxbarashada la soo ururiyey, la hayo, ama ay isticmaaleen dugsiga degmadu.

Khidmadaha

Dugsiga degmadu waxay ku waydiin kartaa kharashka nuqulada diiwaanka ee laguugu sameeyay sida ay dhigayso Qaybta B ee IDEA, haddii aanu kharashku kaaga mamnuucayn xuquuqda aad u leedahay inaad baadho oo dib u eegto diiwaanadan. Kharash laguma waydiinayo inaad baadho ama la soo baxdo xog sida ay dhigayso IDEA.

Wax kaga Beddelka Diiwaanada Codsiga Waalidka
34 CFR §300.618 – §300.621; WAC 392-172A-05215

Haddii aad rumaysantahay in xogta diiwaanka waxbarasho ee ku saabsan ilmahaaga ee la ururiyay, la hayay ama lagu isticmaalay sida uu dhigayo xeerka IDEA uu yahay mid aan sax ahayn, marin habaabis ah, ama ku xadgudbayo gaar ahaanshaha ama xuquuqda ilmahaaga, waxaad waydiisan kartaa degmada in ay bedelaan xogta.

Degmadu waa in ay go'aansataa haddii ay bedelayso xogta iyadoo waafaqsan codsigaaga mudo macquula gudaheed ee helitaanka codsiga.

Fursad Dhageysi, Nidaam Dhageysi, iyo Natiijooyinka Dhageysiyada

Haddii degmadaadu diido in ay bedesho xogta iyadoo waafaqsan codsigaaga, waa in ay kugu wargeliyaan in go'aanka oo kugu waaniyaan xaqaaqa dhageysi degmada ah.

Waxaad xaq u leedahay in aad codsato dhageysi is aad uga doodo xogta ku jirta diiwaanka waxbarashada ilmahaaga si aad u hubiso in aanay khaldanayn, marin habaabis ahayn, ama haddii kale xadgudub ku ahayn gaar ahaanshaha ama xuquuqda kale ee ilmahaaga. Dhageysiga in laga doodo xogta diiwaanka tacliinta waa in loo fuliyaa si waafaqsan hanaanka dhageysiga degmada ee ay dhigayso FERPA. Tani ma aha hanaanka dhageysiga xaqsoorka ee waxbarashada khaaska ah.

Haddii, dhageysiga kadib, degmadu ay go'aansato in xogtu ay tahay mid aan sax ahayn, marin habaabis ah ama haddii kale xadgudub ku ah gaar ahaanshaha ah ama xuquuqaha kale ee ardayga, waa in ay bedeshaa xogtaasi si waafaqsan oo ay kugu wargelisaa adiga isbedeladan iyagoo qoran.

Haddii, dhageysiga kadib, degmadu ay go'aansato in xogtu aanay ahayn mid aan sax ahayn, marin habaabis ah ama haddii kale xadgudub ku ah gaar ahaanshaha ama xuquuqaha kale ee ilmahaaga, waa in ay kugu wargelisaa in aad leedahay xaqa aad ku dhigan karto warbixin diiwaanka waxbarashada ilmahaaga ood kaga faaloonayso xogta ama bixinaysid sababaha aad ku khilaafsantahay go'aanka degmada.

Haddaad go'aansato in aad warbixin ku darto diiwaanka ilmahaaga warbixintu waa in:

1. Haysaa degmadu ka qayb ahaan diiwaanada ilmahaaga ah ilaa inta diiwaanka ama qaybta doodu ka taagantahay la hayo; iyo,
2. Haddii degmadu ay tusto diiwaanka ilmahaaga ama qaybta doodu ka taagantahay cid, warbixinta waa in sidoo kale la tuso ciddaas.

Ogolaanshaha Shaacinta Xogta Qofka Lagu Aqoonsan Karo
34 CFR §300.622; WAC 392-172A-05225

Ogolaanshahaaga qoran waa in la helaa ka hor xogta shakhsiga lagu aqoon karo inta aan loo shaacin kuwa kale ilaa shaacinta xogta ay ka koobantahay ee diiwaanka waxbarashada ilmahaaga la ogolyahay ogolaansho la'aanta waalidka iyadoo sida ay dhigayso FERPA. Guud ahaan, codsigaaga looma baahna kahor xogta qofka lagu aqoonsan karo inta aan loo fasixin saraakiisha hay'adaha kaqaybqaadanaya iyadoo ujeedadu tahay buuxinta shuruudda Qaybta B ee IDEA. Si kasta ha ahaatee, ogolaanshahaaga, ama ogolaanshaha ilmahaagu haddii isaga ama iyadu ay gaadhey da'da qaangaarka, waa in la helaa kahor xogta qofka lagu aqoonsan karo inta aan loo fasixin saraakiisha hay'adaha kaqaybqaadanaya iyagoo siinaya ama bixinaya lacagta adeegyada kala-guurka. Taa waxa raaca haddii ilmahaagu wax ka dhigto dugsi gaar ah, ogolaanshahaaga waa in la helaa ka horta intaan wax xogta shakhsiga lagu aqoon karo aan loo fasixin saraakiisha degmada halka dugsiga gaarka loo leeyahay ku yaalo iyo saraakiisha degmada halka ilmahaagu degenyahay haddii aanad qorshaynayn in aad ka diiwaan geliso ilmahaaga degmada aad degentahay.

Dhowrida Xogta Qofka Lagu Aqoonsan Karo
34 CFR §300.623; WAC 392-172A-05230

Dugsiga degmadaadu waa in ay ilaaliyaan sir ahaanshaha xogta shakhsiga lagu aqoon karo ee ururinta, kaydinta, shaacinta, iyo xaaladaha burburinta kujirta. Mid ah sarkaal dugsiga degmadu waa inuu qaadaa xilka hubinta qarsoodiga wax ah xogta shakhsiga lagu

aqoonsan karo. Dhamaan dadka ururinaya ama adeegsanaya xogta shakhsiga lagu aqoonsan karo waa in ay helaan tababar ama tilmaamo quseeya qarsoodiga sida ay dhigayso Qaybta B ee IDEA iyo FERPA.

Dugsiga degmo kastaa waa in uu u hayaa, baadhitaanka dadwaynaha liiska magacyada hadda iyo boosaska shaqaalaha ku jira wakaalada kuwaas oo galaan gal u yeelan kara xogta shakhsiga lagu aqoonsan karo.

Burburinta, Haynta, iyo Keydinta Xogta
34 CFR §300.624; WAC 392-172A-05235

Dugsiga degmadaadu waa in uu kugu wargeliyaa marka xogta shakhsiga lagu aqoonsan karo la ururiyay, la hayay, ama la isticmaalay in aan in dheeraada loo baahnayn si loo siiyo adeeg waxbarasho ilmahaaga.

Markaan in dheeraada loo baahnayn, xogta waa in lagu burburiyaa codsigaaga. Si kastaba ha ahaatee, diiwaan ku meel gaadha oo ilmahaaga magaciisa, cinwaanka, iyo lambarka telefoonka, buundooyinkiisa, diiwaanka soo xaadirka, xiisadaha uu soo xaadiray, heerka darajada uu dhamaysatay, iyo sanadka uu dhameeyay waxaa laga yaabaa in la hayo waligoodba.

Sharciga gobolka ee ku saabsan haynta diiwaanka waxa uu ku qoran yahay Cutubka 40.14 RCW. Hanaanka ilaa inta ay leegtahay inta degmadu ay haynayso diiwaanada waxa daabacaad ku baahiyay Xoghayaha Gobolka Washington, Qaybta Kaydka Diiwaanada iyo Maamulka Diiwaanada.

Hanaanka Xalinta Khilaafka Waxbarashada Khaaska ah

Waxaad tahay ka qaybgale muhiim ah dhamaan dhinacyada barnaamijka waxbarashada khaaska ah ee ilmahaaga. Ka qaybgalkani waxa uu ka bilaabmaa gudbinta hore ee ilmahaaga. Adiga iyo degmadaada waxaa lagu dhiirigelinayaa inaad ka wada shaqaysaan xallinta khilaafaadka kaas oo saamaynaya barnaamijka waxbarashada khaaska ah ee ilmahaaga. Marka adiga iyo degmadaadu aanay awood u lahayn ay ku xaliyaan khilaafka, waxa jira ikhtiyaaro badan oo ah xalinta khilaafaadka rasmiga ah oo la heli karaa. Ikhtiyaaradan waa dhexdhexaadin, cabashooyinka muwaadinka, iyo hanaanka dhageysiga xaqsoorka ee dhexdhexaadka ah.

Dhexdhexaadin
34 CFR § 300.506; WAC 392-172A-05060–05075

Guud

Adeegyada dhexdhexaadinta ayaad ku heli kartaan bilaa lacag adiga ama degmadu si aad u caawisaan xalinta dhibaatooyinka quseeya aqoonsiga, qiimaynta, meelaynta waxbarasho, iyo siinta FAPE ilmahaaga oo markasta oo hanaanka dhageysiga xaqsoorka la codsado. Dhexdhexaadintu waa mutadawacnimo loomana isticmaali karo in la diido ama la daahiyo xaqaaga hanaanka dhageysiga xaqsoorka ama in la diido wax xuquuqa oo kale oo aad leedahay sida ay dhigayso Qaybta B ee IDEA. Kulanka dhexdhexaadintu waxa loo muddeeyaa qaab wakhti ahaan iyo goob ahaanba u habboon adiga iyo degmada.

Dugsiga degmadu waxa uu soosaari karaan hanaan kaas oo siinaya waalidka aan dooran in ay adeegsanaan habka dhexdhexaadinta, fursad ay ku kulmaan, wakhtiga iyo goobta kugu habboon adiga, oo lala kulmayo dhinaca aan danaynayn:

1. Kaas oo qandaraas kula jira urur xalka muranka kale ee habboon, ama tababrid waalid iyo xarunta xogta ama xarunta khayraadka bulshada waalidka; iyo,
2. Yaa kuu sharaxi lahaa dheefaha oo kugu dhiirigelin lahaa adiga adeegsiga hanaanka dhexdhexaadinta.

Eex La'aanta Dhexdhexaadiyaha

Dhexdhexaadin waxaa fuliya qof takhasus u leh, aan cid u eexan, oo loo tababaray farsamo dhexdhexaadin oo saamayn leh. Qofkaasi waa in uu aqoon fiican ka haystaa shuruucda iyo xeerarka la xidhiidha bixinta waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha. OSPI waxay qandaraas siisaa wakaalad dibada ah si ay u fuliso dhexdhexaadinta. Wakaaladaasi waxay haysaa magacyada dhexdhexaadiyayaasha. Dhexdhexaadiyayaasha waxaa lagu magacaabaa si qorituur ah, wareeg ah, ama siyaabo kale oo aan eexasho ku jirin. Dhexdhexaadiyaha (1) lagama yaabo in uu noqdo shaqaale OSPI, degmo, ama wakaalad kale oo dowlada ah taas oo siinaysa adeegyo toos ah ilmaha ku lugta leh hanaanka dhexdhexaadinta, iyo (2) lagama yaabo inay ka yeelato dan xirfadeed ama shakhsiyeed amuurta. Kulanka dhexdhexaadintu waxa loo muddeeyaa qaab wakhti ahaan iyo goob ahaanba u habboon adiga iyo degmada.

Heshiiska lagu Gaadhay Dhexdhexaadin

Haddii adiga iyo degmadu aad heshiishgaadhaan, waa in lagu dhigaa heshiiska dhexdhexaadinta oo qoran oo aad saxeexday iyo wakiil degmada ka socdaa oo loo oggolyahay inuu galo heshiisyada sharci ahaan dhaqan gala. Gorfaynaha inta lagu jiro kulanka dhexdhexaadinta waa qarsoodi oo looma adeegsan karo cadayn ahaan wixii ah hanaanka dhageysiga xaqsoorka ama dacwadaha madaniga ah ee maxkamada kastoo Federaali ah ama maxkamada Gobolka Washington. Tan waa in lagu sheegaa heshiiska qoran. Si kastaba ha ahaatee, heshiiska dhexdhexaadinta laftiisa waxaa loo isticmaali karaa cadayn ahaan. Heshiiska dhexdhexaadintu si sharci ayuu u dhaqan galaa waxaana laga

dhaqan gelin karaa maxkamad gobol oo kasta oo sharci fulin leh ama maxkamada degmada Maraykanka.

Faraqa u Dhexeeya Baadhitaanada Cabashada Muwaadinka Waxbarashada Khaaska iyo Hannaanka Dhageysiga Xaqsoorka

Qawaaniinta Qaybta B ee IDEA waxay leeyihiin hanaano kala duwan ee cabashooyinka gobolka (cabashada muwaadinka) iyo hanaanka dhageysiga xaqsoorka. Cabashada muwaadinka waxa loo soo gudbin karaa OSPI waxaana usoo gudbinayaa qof ama urur ku tuhunsan in dugsiga degmadu, OSPI, ama wakaalad dadwayne ay ku xadgudubtay shuruudaha Qaybta B, xukunka federaaliga ee ku qoran 34 CFR Qaybta 300, ama shuruucda gobolka fulinaya Qaybta B ee IDEA. Cabashooyinka muwaadinka waxaa baadhaya OSPI, iyadoo ku salaysan xogta xadgudubyada uu bixiyay qofka cabashada soo gudbiyay, iyo dugsiga degmada, ama wakaalad kale oo ka jawaabaysa cabashada. Cabashada muwaadinka waa in lagu soo gudbiyaa hal sano gudahood ee xadgudubka la tuhunsanyahay.

Codsiyada hanaanka dhageysiga xaqsoorka sidoo kale waxaa ka soo gudbin kara adiga ama dugsiga degmada arin kastoo la xidhiidha aqooonsiga, qiimaynta, ama meelaynta waxbarashada ee ilmahaaga, ama siinta waxbarashada dadwaynaha ee ku habboon oo lacag la'aana (FAPE) ilmahaaga. Hanaanka dhageysiga xaqsoorka waxaa fulinaya qaadiga maamulka sharci (ALJ), oo ay shaqaaleeyeen Xafiiksa Dhageysiga Maamul, taas oo ah wakaalad gobol oo madax banaan. Hanaanka dhageysiga xaqsoorka guud ahaan waxa uu ku lug yeeshaa cadaynta markhaatiga iyo hordhaca cadaynta. Codsiyada Hanaanka dhageysiga xaqsoorka waa in lagu soo gudbiyaa laba sano gudahood ee xadgudubka la tuhunsanyahay (iyagoo waxoogaa metelaad khalad iyo qarinta xogtu ay ka reebantahay)

Jadwalada iyo hababka cabashada muwaadinka iyo hanaanka dhageysiga xaqsoorka waxaa lagu sharaxayaa xaga hoose.

Hanaanka Cabashada Muwaadinka
34 CFR §300.151 – 300.153; WAC 392-172A-05025–05045

OSPI waxay leedahay nidaamyo lagu xaliyo cabashooyinka gobolka. Hanaanadaasna waxay ku qoran yihiin xeerarka gobolka iyo xogta qusaysa cabashooyinkuna waxa lagu hayaa bogga internetka.

Haddii adiga, qof kastaa, ama urur, aaminsan yahay degmo, OSPI, ama meel waxbarasho oo jirta oo ay maamusho IDEA ay ku xadgudubtay Qaybta B ee IDEA, shuruucda fulinta Qaybta B, ama sharciga gobolka ee lagu dabaqi karo, waxaad u soo gudbin kartaa cabashada Office of Superintendent of Public Instruction (OSPI), Special

Education, PO Box 47200, Olympia, WA 98504-7200. Waa in aad siisaa nuqul cabashada ah degmada ama wakaaladaha kale ee aad ka cabanayso.

Cabasho Gudbinta

Cabashada qoran waa in aad saxeexdaa adigu ama qofka ama ururka cabashada ama ashkatada gudbinayaa waana in waxa soo socodaa ay ku jirtaa:

- Warbixinta in degmo ama wakaalad kale ku xadgudubtay shuruudda Qaybta B ee IDEA, shuruucda fulinaysa Qaybta B, lagu dabaqi karo shuruucda gobolka, ama warbixin in degmadu ama wakaalad kale aanay fulinayn dhexdhexaadinta ama xalka heshiiska;
- Magaca iyo cinwaanka degmada ama wakaalada;
- Magaca ardayga, haddii cabashadu ay gaar u tahay ardayga, iyo xogta la xidhiidhka ee ardayga haddii uu ardaygu yahay bilaa hoy;
- Magaca dugsiga ardayga uu dhigto;
- Faahfaahinta dhibaatada leh xaqiiqooyin gaar ah;
- Xalka dhibaatada ee lagu talo bixiyay ilaa xadka xogta laga ogyahay ee aad heli karto wakhtiga aad gudbiso cabashada; iyo,
- Magacaaga, cinwaanka, iyo lambarka telefoonka.

Xadgudubku waa in aanu dhicin hal sano ka hor taariikhda ashkatada, buuxinta waxyaabaha la isaga baahanyahey ee sare, ay hesho OSPI.

OSPI waxay samaysay warqado la buuxinayo oo aad u isticmaali karto in aad ku gudbiso ashkatada. Foomkani wuxuu diyaar ku yahay OSPI - Waxbarashada Khaaska - Gubdi Cabashada Muwaadinka - bogga webka Su'aalaha Sida Joogtada la Isku Waydiiyo iyo foomka dalbashada. Lagaagama baahna isticmaalka foomkan.

Baadhitaanada Cabashada

OSPI waa in ay baadhaa oo soo saartaa go'aan qoran 60 maalmood ka dib markay hesho cabashada, ilaa kordhinta wakhti loo damaano qaado mooyee. Inta lagu jiro 60 maalmood, OSPI (1) waxay u baahantahay in ay degmadu bixiso jawaabta cabashada; (2) oo ay ku siisaa adiga ama soo dacweeyaha fursada aad ku soo gudbinayso xog dheeraada oo ku saabsan eedaynta askhatada (3) laga yaabaa in ay fuliso baadhitaan goobta ah oo madax banaan, haddii OSPI ay go'aamiso in daruuri tahay; oo (4) dib u eegto dhamaan xogta la xidhiidha ayna samayso go'aamin madax banaan oo ah haddii ay degmada ama wakaalad kale ay ku xadgudbayso shuruudaha la xidhiidha Qaybta B ee IDEA.

Baadhitaan, Balaadhin, Go'aan Qoran

Xadiga wakhtiga 60 maalmood waa la kordhin karaa kaliya haddii: (1) duruufo gaar ahi ay jiraan oo ku saabsan ashkato gaar ah; ama, (2) adiga iyo degmada dugsigaagu si aan khasab ahayn ay ku ogolaadaan ayadoo qoraal ah in la kordhiyo wakhtiga si loogu xaliyo

cabashada dhexdhexaadin ama qaab kale oo lagu xaliyo khilaafaadka si loo xaliyo khilaafka.

Go'aan qoran ayaa loo soo dirayaa adiga ama qofka ashkatoonaya iyo dugsiga degmada. Go'aanka qorani waxa uu ka hadli doonaa eedayn kasta. Eedayn kastana go'aanka qorani waxa uu sheegi doonaa natiijada xaqiiqda, gebebooyinka, sababaha go'aanka iyo talaabooyin kale oo sixitaan oo macquul ah oo loo arko lama huraan si loo xaliyo cabashada haddii uu dhacay xadgudub.

Xalinta Cabashada

Markay OSPI ku hesho xadgudub ama guul daro in la bixiyo adeegyada habboon iyadoo u maraysa hanaanka ashkatada, go'aanku waxa uu ka hadlayaa:

1. Sida dib loogu saxayo diidmada adeegyadaas, haddii ay habboon tahayna ay ku jirto, ku abaalmarinta magdhow lacageed ama talaabooyin kale oo sixitaana oo ku habboon baahida ardayga (dayda); iyo,
2. Siin mustaqbalka oo ku haboon adeegyada waxbarashada khaaska ah dhamaan ardayda.

Cabashada Muwaadinka Waxbarashada Khaaska ah iyo Hanaanka Dhageysiga Xaqsoorka

Haddii askhatada muwaadinka la helay taas oo ah mawduuca hanaanka dhageysiga xaqsoorka ama cabashadu ka koobantahay arimo farabadan, oo mid ama in ka badan oo arimahaas ahi ay qayb ka yihiin hanaanka dhageysiga xaqsoorka, OSPI waa in ay dhinac iska dhigto (in aanay baadhin) wax kamid ah cabashada taas oo lagaga hadlayo hanaanka dhageysiga xaqsoorka inta uu dhageysigu dhamaanayo. Arin kastoo ku jirta cabashada oo aan qayb ka ahayn hanaanka dhageysiga xagsoorka waa in lagu xaliyaa gudaha wakhtiga askhatada.

Haddii arin ku jirta ashkatada hore go'aan lagaga gaadhay hanaanka dhageysiga xaqsoorka oo qusaysa dhinacyo isku mida, go'aanka dhageysigu waa sharci oo OSPI waa in ay ku wargelisaa dacweeyaha in aan laga yaabin in ay baadho arintaa.

OSPI waa in ay xalisaa askhatada ku eedaynaysa degmada in ay ku guul daraysatay in ay fuliso go'aanka hanaanka xaqsoorka.

Hanaanka Loo Marayo Dhageysiga Xaqsoorka
34 CFR §300.507 – 300.513; WAC 392-172A-05080–05125

Guud

Adiga ama dugsiga degmada ayaa soo gubin kara codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka ee arin kasta oo la xidhiidha aqoonsiga, qiimaynta, ama meelaynta waxbarashada ilmahaaga ama siinta FAPE ilmahaaga. Degmadu waa in ay kugu wargelisaa wixii adeeg sharci oo bilaa lacag ah ama qiimahoodu hooseeyo iyo adeegyada kale ee la xidhiidha ee laga heli karo aagga markii hanaanka dhageysiga xaqsoorka la gudbinayo ama markaad codsanayso xogtan. Nidaanyada hanaanka dhageysiga xaqsoorka, "adiga" waxa kamid ah qareenkaaga haddaad mid haysato, oo "degmadana" waxa kamid ah qareenka degmada haddii ay degmadu wakiilanayso qareen.

Soo Gudbinaya

Si u codsato dhageysi, adiga ama degmada waa inaad u gudbisaan codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka dhinaca kale. Codsigaasu waa in uu ka koobnaadaa dhamaan waxa ay ka kaboontahay ee hoos ku qoran waana in loo ilaaliyo qarsoodi ahaan.

Adiga ama degmada, ku kastoo soo gudbiyay codsiga, waa in sidoo kale uu siiyo OSPI, Adeegyada Khayraadka Maamul (Administrative Resource Services), nuqul codsiga dhageysiga cinwaanka soo socda:

Office of Superintendent of Public Instruction
Administrative Resource Services
Old Capitol Building
PO Box 47200
Olympia, WA 98504-7200
Iimeylka: appeals@k12.wa.us

Codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka waa in ay sidoo kale ku jiraan:

1. Magaca ardayga;
2. Cinwaanka ardaygu degenyahay;
3. Magaca dugsiga ardayga;
4. Haddii uu ardaygu hoy la'aan yahay ama kuraygu, xogta lagala xidhiidhayo ardayga;
5. Faahfaahin nooca dhibaatada, ooy ku jirto xaqiiqooyin la xidhiidha dhibaatada; iyo,
6. Xalka dhibaatada ee lagu talo bixiyay ilaa heerka laga ogyahay ood adna ama degmadu heli karto wakhtigaas.

Ogaysiika loo Baahanyahay ka Hor Dhegaysiga ee Codsiga Hanaanka Dhageysiga Xaqsoorka

Adiga ama degmadu lagama yaabo in ay yeelato hanaanka dhageysiga xaqsoorka ilaa adiga ama degmadu ay soo gudbiyaan codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka cidda kale oo ay siiso OSPI nuqul codsiga taas oo ay ku qoran tahay xogta ku qoran kor.

Ku Filaanta Codsiga Dhageysiga

Si uu hore ugu socdo codsiga dacwad hanaanka dhageysiga xaqsoorku, waa in looga fekeraa wax ku filan. *Ku filnaanta* micnaheedu waa in uu codsigu buuxiyay shuruudaha ay ka koobantahay ee kor lagu sheegay hoosta *Soo Gudbinta*. Codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka waxaa looga fekerayaa mid ku filan ilaa dhinaca helay codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka ay ugu sheegaan ALJ iyo dhinaca kale qoraal ahaan, 15 maalmood gudahood, in dhinaca helay ay rumaysantahay in codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka aanu ku filnayn.

Shan maalmood gudahood helitaanka ogaysiinta filnaansho la'aanta, ALJ waa in ay go'aamisaa haddii codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka uu buuxiyay shuruudaha ku qoran kor, oo ay ku ogaysiisaa adiga iyo degmada qoraal ahaan isla markaaba.

Wax ka Beddelka Codsiga Dhageysiga

Adiga ama degmadaadu waxa ay isbedel ku samayn karaan codsiga dhageysiga keliya haddii:

1. Dhinaca kale wuxuu ku ogolaaday isbedelka qoraal ahaan waxaana la siinayaa fursada lagu xalilaayo codsiga dhageysiga kulan xalin ah (haddii adiga, waalidku codsaday hanaanka dhageysiga xaqsoorka), hoos lagu faahfaahiyey; **ama,**
2. In aan ka dambayn shan maalmood ka hor intaanu bilaabmin hanaanka dhageysiga xaqsoorka, sarkaalka dhageysigu waxa uu ogolaadaa isbedelada.

Haddii adigu aad tahay dhinaca codsanaya dhageysiga oo aad isbedel ku samayso codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka, jawalka kulanka xalinta iyo mudada xalintu (Eeg: *Nidaamka Xalinta*) wuxuu bilaabmayaa hadana taariikhda codsiga bedelan la xereeyo, ama taariikhda ALJ ay damaanad qaado codsiga.

Jawaabta Degmada ee Codsiga Hanaanka Dhageysiga Xaqsoorka

Haddii degmadu aanay kuu soo diran adiga ogaysiiska hore oo qoran, sida lagu faah faahiyay cinwaanka hoostiisa *Kahor Ogaysiiska Qoran,* iyadoo qusaysa mawduuca uu ka koobanyahay codsigaaga hanaanka dhageysiga xaqsoorka, degmadu waa in ay 10

maalmood gudahood helitaanka codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka, kuu soo dirtaa jawaab ay ku jirto:

1. Sharaxaad sababta ay degmadu ugu talo bixisay ama ku diiday in ay qaado talaabada lagu soo qaaday codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka;
2. Faahfaahin ikhtiyaarada kale ee kooxda IEP ee ilmahaaga looga fekeray iyo sababaha ikhtiyaaradaa loo diiday;
3. Faahfaahin hab kastoo qiimayn, diiwaan, ama warbixinta degmadu adeegsatay talaabada lagu talo bixiyay ama la diiday; iyo,
4. Faahfaahinta iyo sababaha kale ee quseeya talaabada lagu talo bixiyey ama la diiday ee degmada.

Degmadu waxay wali cadayn kartaa in codsigaaga hanaanka dhageysiga xaqsoorka aanu ku filnayn xataa inkastoo ay kugu siinayso xogta qodobada 1-4 ee kore.

Jawaabta Dhinaca Kale ee Codsiga Hanaanka Dhageysiga Xaqsoorka

Laga reebo hanaanka dhageysiga xaqsoorka loo dar-dar geliyay edaabta, oo lagu falanqeeyay hoos *Habka Han*aanka *Dhageysiga Xaqsoorka ee Edbinta*, dhinaca helaya codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka, 10 maalmood gudahood helitaanka codsiga, waa in ay u dirtaa kooxda kale jawaab taas oo si gaar ah u lafo guraysa arimaha ku jira codsiga. Labada dhinac midkood ayaa weli cadayn kara in codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorku aanu ku filnayn.

Qaabka Noocyada
34 CFR §300.509; WAC 392-172A-05085

Waxay OSPI soosaartay qaabka foomka codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka si uu kaaga caawiyo gudbinta codsi ah hanaanka dhageysiga xaqsoorka. Foomkani wuxuu diyaar ku yahay OSPI - Waxbarashada Khaaska - Codso Hannaanka Dhageysiga Xaqsoorka - bogga webka Su'aalaha Sida Joogtada la isku Waydiiyo iyo foomka dalbashada. Lagaagama baahna isticmaalka foomkan. Si kastaba ha ahaatee, xaqa aad u leedahay hanaanka dhageysiga xaqsoorka waa laguu diidi karaa ama dib baa loo dhigi karaa haddii hanaanka dhageysiga xaqsoorka aanay ku jirin dhamaan xogaha loo baahanyahay. Sidoo kale waxaad heli kartaa nuqulka foomka codsiga dhageysiga ka yimid waaxda waxbarashada khaaska ah ee degmadaada.

Meelaynta Ardayga Marka Hanaanka Dhageysiga Xaqsoorka la Sugayo
34 CFR §300.518; WAC 392-172A-05125

Laga reebo sida lagugu siiyay hoosta cinwaanka *Hababka Markii la Edbinayo Ardayda Naafada Ah,* marka codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka loo diro dhinac kale, inta lagu guda jiro mudada hanaanka xalinta, iyo inta la sugaayo go'aanka hanaanka dhageysiga

xaqsoorka ee aan eexda lahayn ama dacwada maxkamada ee qusaysa rafcaanka go'aanka ALJ, ilmahaagu waa in uu joogaa meeshiisa ama meesheeda waxbarasho ee hadda idinkoo adiga iyo degmadu isku raaca mooyee.

Haddii codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka uu quseeyo codsiga hore ee aqbalaada dugsiga dadwaynaha, ilmahaaga oo wata ogolaanshahaaga waa in lagu meeleeyaa barnaamij dugsiga dadwaynaha caadiga ah ilaa dhamaadka dhamaan dacwadaha sidana.

Haddii codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka uu quseeyo siinta adeegyada hore sida ay dhigayso Qaybta B ee IDEA, ee ilmahaaga, oo ka soo gudbaya kala guurka ee ugu adeegida sida ay dhigayso Qaybta C ee IDEA ilaa Qaybta B ee IDEA, oo aan in dheeraada xaq u lahayn adeegyada Qaybta C maadaama ilmahaagu dhaafay saddex, degmada loogama baahna inay siiso adeegyada Qaybta C ee uu helayey. Haddii ilmahaaga la helo in uu xaq ugu leeyahay sida ay dhigayso Qaybta B ee IDEA iyadoo aad ogolaansho siisay in ilmahaagu helo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha markii ugu horaysay, markaa, inta la sugayo natiijada dacwada, degmadu waa in ay bixisaa waxbarashadaa khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha ee aaydaan isku khilaafsanayn adiga iyo degmadu.

Haddii ALJ ay gaadho go'aan in bedelka meelayntu uu haboonyahay, go'aanka ku saabsani meelaynta waa in loogu dhaqmaa sidii heshiis u dhexeeya adiga iyo dugsiga degmada oo ah ujeedooyinka meelaynta inta lagu guda jiro wax rafcaan maxkamadeed ah oo go'aanka hanaanka xaqsoorka ah.

Hanaanka Xalinta
34 CFR §300.510; WAC 392-172A-05090

Kulanka Xalka

15 maalmood gudahood ka dib markaad soo gudbisay codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka degmada iyo OSPI, degmadu waa in ay isugu yeedho kulan adiga iyo xubinta ay qusayso ama xubnaha kooxda IEP u leh aqoon gaar ah xaqiiqooyinka lagu aqoonsaday codsigaaga hanaanka dhageysiga xaqsoorka. Kulankan waa in uu dhacaa ka hor intaanu bilaaban hanaanka dhageysiga xaqsoorka, ilaa adiga iyo degmadu aad isku raacdaan dhexdhexaadin mooyee ama isku raacdaan in la dhaafo kulanka xalka. Kulanka:

1. Waan in uu ku jiraa wakiilka degmadu kaas oo leh masuuliyada go'aan gaadhid isagoo ku hadlaya magaca degmada; **iyo,**
2. Laga yaabee in aanay ku jirin qareenka degmada ilaa uu kula socdo qareen mooyee.

Ujeedada kulanku waa in aad adigu falanqayso codsigaaga hanaanka dhageysiga xaqsoorka iyo xaqiiqooyinka qaabeeya seeska codsiga, sidaas darteed degmadu waxay haysataa fursada lagu xalinayo khilaafka. Adiga iyo degmadu waxaad go'aan ka gaadhaan xubnaha la xidhiidha kooxda IEP in ay yimaadaan kulanka xalinta.

Kulanka xalintu lama huraan maaha haddii:

1. Adiga iyo degmadu aad isku waafaqdaan iyadoo qoran in aad dhaaftaan kulanka; **ama,**
2. Adiga iyo degmadu aad isku raacdaan habka dhexdhexaadinta, sida lagu faahfaahiyay hoosta cinwaanka *Mediation*.

Mudada Xalka

Haddii degmadu aanay u xalin codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka si aad ku qanacdo 30 maalmood gudahood markii aad siiyay codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka degmada iyo OSPI, hanaanka dhageysiga xaqsoorka waxa laga yaabaa in uu dhaco.

Wakhtiga 45-maalmood ee soo saarida go'aanka kama dambaysta ah waxa uu bilaabmayaa dhamaadka mudada xalinta ee 30-maalmood, dhowr ka reebanaan ah oo in ay ku haboonaato mudada xalinta 30 maalmood loo sameeyay, sida hoos lagu faahfaahiyay.

Adiga iyo degmada oo labadiinuba isku raacay in aad dhaaftaan habka xalinta mooyee ama isticmaalka dhexdhexaadin, guul daradaada in aad ka qaybgasho kulanka xalinta waxay daahin doontaa wakhtiga habka xalinta iyo hanaanka dhageysiga xaqsoorka ilaa aad ku waafaqdo ka qaybgalka kulanka.

Haddii degmadu aanay awood u lahayn in ay hesho ka qaybgalkaaga kulanka xalinta ka dib samaynta dedaal macquula oo si faahfaahsan u diiwaan gelisay dedaaladan, laga yaabaa degmadu in ay, dhamaadka mudada xalinta 30 maalmood, codsato in ALJ joojiso codsigaaga hanaanka dhegaysiga xaqsoorka. Dugsiga degmadu waa in uu si faahfaahsan u diiwaan geliyaa isku daygiisa in ay qabanqaabiyaan xalinta kulanka oo labada dhinacba isku raacsan yihiin wakhtiga iyo goobta. Diiwaanka faahfaahsan ee qoran waxa ku jira isku-dayada, sida:

1. Diiwaan faahfaahsan oo telefoonadii la diray ama la isku deyay iyo natiijooyinjkii telfeoonadaas;
2. Nuqulada farriimaha lagu soo diray iyo wixii jawaabo la helay; **iyo,**
3. Diiwaan faahfaahsan oo ah booqashooyinkii lagu yimid gurigaaga ama shaqada iyo natiijooyinka booqashooyinkaas.

Haddii degmadu ay ku guul daraysato in ay qabto kulanka xalinta 15 maalmood gudahooda markii aad siiyay degmada iyo OSPI codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka, **ama** degmadu ku guul daraysato in ay ka qaybgasho kulanka xalinta, waxaad waydiisan kartaa ALJ inuu amro wakhtiga 45 maalmood ee hanaanka dhageysiga xaqsoorka ah uu bilaabmayo.

Ku hagaajinta 30 Maalmood ee Mudada Xalka

Haddii adiga iyo degmadu aad isku raacdaan iyadoo qoraal ah in aad dhaaftaan kulanka xalinta, ka dib wakhtiga 45 maalmood ee hanaanka dhageysiga xaqsoorka waxa uu bilaabmayaa maalinta xigta.

Ka dib bilowga dhexdhexaadinta ama kulanka xalinta iyo ka hor dhamaadka mudada 30 maalmood ee xalinta, haddii adiga iyo degmadu aad isku waafaqdaan qoraal ahaan in aanu suuragal ahayn wax heshiisi, ka dib wakhtiga 45 maalmood ee hanaanka dhageysiga xagsoorka ayaa bilaabma maalinta ku xigta.

Haddii adiga iyo degmadu isku raacdaan in aad isticmaashaan habka dhexdhexaadinta, laakiin aydaan weli heshiis gaadhin, dhamaadka mudada xalinta ee 30 maalmood, labada dhinacba waxay isku raaci karaan qoraal ahaan in ay sii wataan dhexdhexaadinta ilaa heshiis la gaadho. Si kastaba ha ahaatee, haddii adiga ama degmadu aad ka noqotaan habka dhexdhexaadinta, ka dib wakhtiga 45 maalmood ee hanaanka dhageysiga xagsoorka waxa uu bilaabmaa maalinta xigta.

Heshiishka Xalka oo Qoran

Haddii adiga iyo degmadu aad ku xalisaan khilaafkiina kulanka xalinta, adiga iyo degmadu waa in aad gashaan heshiis ku fulaya si sharci ah kaasi oo:

1. Oo uu saxeexo adiga iyo wakiilka degmada kaas oo awood u leh in uu u galo degmada heshiis sharci ah; iyo,
2. Ka dhaqangeli kara Maxkamad kastoo Sare oo ku taal Gobolka Washington ama meel kale oo sharciga laga fulin karo oo ku habboon maxkamada degmada ee Maraykanka.

Mudada Dib U eegidda Heshiiska

Haddii adiga iyo degmadu aad heshiis gashaan ay keentay kulanka xalinta, mid uun adiga ama degmadu waxaad ku tirtiri kartaan heshiiska 3 maalmood oo shaqo gudahood ee wakhtiga adiga iyo degmadu aad saxeexdeen heshiiska.

Hanaanka Dhageysiga Xaqsoorka ee Dhexdhexaadka ah
34 CFR §300.511; WAC 392-172A-05080–05095

Guud

Markastoo la soo gudbiyo codsi hanaanka dhageysiga xagsoorka, adiga ama degmada ku lug leh khilaafku waa in aad heshaan fursad hanaanka dhageysiga xagsoorka oo aan eex lahayn.

Xaakimka Sharci Maamuleed (ALJ)

Dhageysiga waxa qaban doona ALJ takhasus u leh oo madax banaan, kaas oo ay shaqaaleeyeen Xafiiska Dhageysiyada Maamuleed (Office of Administrative Hearings, OAH).

Ugu yaraan, ALJ:

1. Waa in aanu noqon shaqaale OSPI ama degmada ku lug leh waxbarashada ama daryeelka ilmaha. Si kastaba ha ahaatee, qofku ma aha shaqaale wakaalada oo keliya maxaa yeelay isaga ama iyada waxaa bixiya kharashkiisa wakaalada si uu u noqdo ALJ;
2. Waa in aanu yeelan dan shaqo ama shakhsiyeed taas oo khilaafaysa ujeedada ALJ wakhtiga dhageysiga;
3. Waa in uu aqoon u leeyahay oo ogsoonyahay shuruudaha sharci ee IDEA, iyo shuruucda gobolka iyo federaaliga iyo gobolka ee la xidhiidha IDEA, iyo fasiraada sharci ee IDEA ee maxkamadaha gobolka iyo federaaliga; **iyo,**
4. Waa in uu aqoon iyo karti u leeyahay uu ku fuliyo dhageysiga, oo uu sameeyaa oo qoraa go'aamada, oo waafaqsan heer ku dhaqanka sharci, ee habboon.

Degmo kastaa waa in ay haysataa liiska magacyada kuwaas oo noqda ALJ, taas oo ay kujirto warbixinta takhasuska ALJ kasta. Liiska magacyada ALJ sidoo kale waxaa lagu hayaa Bogga internetka ee OSPI.

Mowduuca Hanaanka Dhageysiga Xaqsoorka

Dhinaca codsada hanaanka dhageysiga xaqsoor kuma soo qaadi karo arimo hanaanka dhageysiga xaqsoorka ee aan lagaga hadlin codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka, iyadoo dhinaca kale ay waafaqaan mooyee.

Wakhtiga Codsashada Dhageysi

Adiga ama degmada waa in ay soo gudbisaa codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka laba sanadood gudahood taariikhda adiga ama degmadu ogaatay, ama ogaan lahaydeen, arimaha lagaga hadlay codsiga dhageysiga.

Ka reebenayaalka Wakhtiga

Jadwalka kor ku xusan kuma haboona haddii aanad soo gudbin codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka maxaa yeelay:

1. Degmadu si gaar ah bay khalad wakiil uga noqotay in ay xalisay dhibaatada ama arimaha aad ku soo qaadayso codsiga dhageysiga; **ama,**
2. Degmadu waxay kuu diiday xogta adiga kaa timid taas oo loo baahna in lagu siiyo sida ay dhigayso Qaybta B ee IDEA.

Xuquuqda Dhageysiga
34 CFR §300.512; WAC 392-172A-05100

Guud

Waxaad leedahay xaq aad wakiil ugaga noqonaysa naftaada hanaanka dhageysiga xaqsoorka (oo ay ku jirto dhageysi la xidhiidha nidaamyada edaabeed). Adiga iyo dugsiga degmadu, dhinacyada hanaanka dhageysiga xaqsoorka (oo ay ku jirto dhageysiga la xidhiidha nidaamyada edaabeed), waxaad xaq u leedihiin:

1. In uu wakiil idiinka noqdo qaryaqaan oo ay la socdaan oo la talinayaan dad aqoon khaasa ama tababar quseeya dhibaatooyinka ardayda naafada ah leh;
2. Soo bandhigaa cadaymo oo waajahaa, maragga dhinaca kale su'aalaa, oo dalbadaa joogitaanka markhaatiga;
3. Mamnuucaa keenista cadayn kasta wakhtiga dhageysiga taas oo aan la sii shaacin shan maalmood oo shaqo ka hor dhageysiga;
4. Helaa mid qoran, ama, ikhtiyaarkaaga, elektaroonik ah, diiwaanka eray kasta oo dhageysiga la is yidhi; **iyo,**
5. Helaa mid qoran, ama ikhtiyaarkaaga, natiijooyinka xaqiiqada ah iyo go'aanada oo elektarooniya.

Shaacinta Dheeraadka ah ee Xogta

Ugu yaraan shan maalmood oo shaqo ka hor hanaanka dhageysiga xaqsoorka, adiga iyo degmadu waa in ay isku shaaciyaan midba midka kale dhamaan qiimaynta la dhamasytiray taariikhdaas iyo talooyinka ku saabsan qiimaynahaas taas oo aad adiga ama degmadu aad rabtaan in aad isticmaashaan dhageysiga.

ALJ waxaa ay ka mamnuuci kartaa dhinac kasta oo ku guuldaraysata in ay u hogaansanto shuruudaha keenida qiimaynta la xidhiidha iyo talooyinka wakhtiga dhageysiga iyadoon ka haysan ogolaansho dhinaca kale.

Xuquuqda Waalidka ee Dhageysiga

Waa in aad xaq u lahaataa:

1. In ilmahaagu joogo;
2. U furtaa dhegaysiga dadwaynaha; iyo,
3. Lagugu siiyaa diiwaanka dhageysiga, natiijooyinka xaqiiqda iyo go'aanada bilaa lacag.

Wakhtiga iyo Habboonida Dhageysiga
34 CFR §300.515; WAC 392-172-05110

In aan ka dambayn 45 maalmood ka dib marka uu dhaco wakhtiga 30 maalmood ee mudada kulanka xalintu **ama**, in aan ka dambayn 45 maalmood marka uu dhaco mudadii loo qabtay xalinta ee dib loo habeeyey:

1. Go'aan kama dambaysaa lagu gaadhaa dhageysiga; iyo,
2. Nuqul ka mida go'aanka loo so diraa dhinac kasta.

ALJ waxaa laga yaabaa in ay bixiso mudo kordhin gaar ah wixii ka dambeeya 45 maalmood mudada kor lagu faahfaahiyay marka uu codsado dhinac.

Dhageysi kastaa waa in lagu fuliyaa wakhtiga iyo goobta macquul ahaan ku habboon adiga iyo ilmahaaga.

Go'aanka Dhageysiga
34 CFR § 300.513; WAC 392-172-05105

Go'aanka ALJ

Go'aanka ALJ ee ku saabsan haddii ilmahaagu helay waxbarashada dadwaynaha oo lacag la'aana oo ku habboon (FAPE) waa in ay ku salaysnaadaan sababo dhab ah.

Dhageysiyada halka aad ku tuhmayso in degmadu ay samaysay xadgudub nidaamka ah, ALJ waxaa laga yaabaa in ay hesho in ilmahaagu aanu helin FAPE keliya haddii ku filnaan la'aanta nidaamka:

1. Lagu farageliyay xaqa ilmahaagu uu u leeyahay FAPE;
2. Si aada loo soo farageliyay fursadahaaga ka qaybgalka hanaanka go'aan gaadhista ee ku saabsan siinta FAPE ilmaahaaga; **ama,**
3. Keentay waayitaanka nafciyadii waxbarasho.

Qodobka Dhismaha

Xataa haddii ALJ aanay helin xadgudub FAPE, ALJ waxay weli kari kartaa in ay degmada ku amarto in ay u hogaansamaan shuruudaha ku jira qaybta hanaanka dhowrida ee shuruucda federaaliga sida ay dhigayso Qaybta B ee IDEA (34 CFR §300.500 ilaa 300.536).

Codsi ka gaara Hanaanka Dhageysiga Xaqsoorka

Waxaad gudbin kartaa codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka oo ka gooni ah arinka codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka hadda ka horba la soo gudbiyay.

Natiijooyinka iyo Go'aanka ku socda Gudida la Talinta iyo Dadwaynaha

OSPI waxay tirtiraysaa wixii xog shakhsi lagu aqoonsan karo, iyo:

1. Siisaa wixii soo baxa iyo go'aanada hanaanka dhageysiga xaqsoorka Gudida La talinta Waxbarashada khaaska ah ee Washington (Washington's Special Education Advisory Committee(SEAC)); iyo,
2. Waxay ka dhigtaa wixii la helay iyo go'aamadaba kuwa dadwaynuhu heli karaan.

Gebagebada Go'aanka; Rafcaan
34 CFR §300.514; WAC 392-172A-05115

Go'aanka lagu gaadho hanaanka dhageysiga xaqsoorka (oo ay ku jirto dhageysiga la xidhiidha nidaamyada edaabeed) waa kama dambays, ilaa uu dhinac ah kuwa (adiga ama degmada) ku lug lahaa dhageysigu uu rafcaan ka qaato go'aanka isagoo ku keenaya talaabo madani ah mooyee, sida hoos lagu faahfaahiyay.

Dacwadaha Madaniga ah, oo lagu Darayo Mudada La soo Gudbiyay Dacwadahaas
34 CFR §300.516; WAC 392-172A-05115

Guud

Haddii labada kooxood midkood aanu waafiqin waxa soo baxay iyo go'aanka hanaanka dhageysiga xaqsoorka (ay ku jirto dhagaysiga la xidhiidha nidaamyada edaabeed), dhinacaasi waxay xaq u leedahay in ay dacwad madani ah keento iyadoo ay la socoto wixii ku saabsan xaalada u ahaa mowduuca hanaanka dhageysiga xaqsoorka. Ficilka waxaa la keeni karaa maxkamada gobolka ee garsoorka adag (maxkamad degmo taasoo leh awood ay ku dhageysato kiiska noocan ah) ama maxkamad degmo ee Maraykanka. Maxkamadaha degmada Maraykanku waxay leeyihiin masuuliyada ay ku xukumaan dacwadaha lagu keeno sida ay dhigayso Qaybta B ee IDEA iyadoon tixgelin inta uu khilaafku leegyahay.

Xadidida Wakhtiga

Kooxda dacwada keenaysa waxay haysataa 90 maalmood laga bilaabo taariikhda go'aanka ALJ in ay soo gudbiyaan dacwada madaniga ah.

Hanaan Dheeraada

Dacwad kastoo madani, maxkamadu waxay:
1. Heshaa diiwaanka dacwadaha maamuleed;
2. Ku maqashaa cadayn dheeraada codsigaaga ama codsiga degmada; iyo,
3. Ku salaysaa go'aankeeda ahmiyada cadaynta oo siisaa caawimada ay maxkamadu go'aansato in ay habboontahay.

Sharciga Dhismaha

Waxna kaas oo ku jira Qaybta B ee IDEA ma xayiro ama xadido xuquuqda, hanaanka iyo xalalka hoos timaada Distuurka Maraykanka, Xeerka Naafada ee Maraykanka ee 1990, Cinwaanka V ee Xeerka Dib u dejinta ee 1973 (Qaybta 504), ama Sharciyada kale ee Federaaliga ee ilaalinaya xuquuqda ardayda naafada ah. si kastaba ha ahaatee, haddii aad gudbinayso dacwad madani ah sida ay dhigayaan sharciyadaas oo aad raadinayso caawin taasi oo sidoo kale la heli karo sida ay dhigayso Qaybta B ee IDEA, hanaanka dhageysiga xaqsoorka kor lagu faahfaahiyay waa in la soo adeegsaday xadka la midka ah haddii loo baahnaan lahaa haddii aad ku gudbin lahayd dacwada sida ay dhigayso Qaybta B ee IDEA. Taas macnaheedu waxa weeyi waxaad heli kartaa xalal laga heli karo sharciyada kale kuwaas la mid ah kuwa laga helo sida ay dhigayso IDEA, laakiin guud ahaan, si aad u hesho caawin sida ay dhigayaan sharciyadan kale; ugu horayn waa in aad isticmaasho hanaanka dhageysiga xaqsoorka si aad u hesho xalalka laga heli karo sida ay dhigayso IDEA ka hor intaanad u tegin maxkamada si toos ah.

Kharashka Qaryaqaanka
34 CFR §300.517; WAC 392-172A-05120

Guud

Haddii aad ku guulaysato dacwada madaniga ah oo uu kaa wakiil yahay qaryaqaan, maxkamada oo go'aankeeda leh, waxay kugu abaalmarin kartaa kharashka qareenka ee macquulka ah sidii qayb kharashaadka adiga xagaaga ah.

Haddii wax talaabo ah ama dacwada hoos timid Qaybta B ee IDEA, maxkamadu, iyadoo go'aankeeda leh, waxay u siinaysaa kharashka qareenka sidii qayb kharashka dugsiga degmada guulaysatay ama OSPI, oo uu bixinaayo qareenkaagu, haddii qareenku: (a) soo gudbiyay ashkato ama kiis maxkamadeed oo maxkamadu ay ka heshay in uu yahay kiis ciyaara, aan macquul ahayn, ama bilaa aaasaas ah; **ama**, (b) oo uu sii dacweeyo ka dib markii dacwada loo arkay mid ciyaara, aan macquul ahayn ama bilaa aasaasa; **ama,**

Waxa talaabo ah ama dacwada oo la hoos keenay Qaybta B ee IDEA, maxkamadu iyadoo leh go'aankeeda, waxay siinaysaa kharashka qareenka oo macquula sidii qaybta kharashka dugsiga degmada oo guulaystay ama OSPI, in aad adigu bixiso ma qareenkaagu, haddii aad codsato hanaanka dhageysiga xaqsoorka ama mar dambe loo keenay kiis maxkamadeed keenay ujeedo aan sax ahayn sida in la handado, lagu keeno daahitaan aan lama huraan ahayn, ama loo kordhiyo si aan lama huraan ahayn kharashka dacwada.

Bixinta Kharashka

Qareenka kharashkiisu waa in uu ku salasyanaadaa sicirka ka jira bulshada dhexdeeda taas oo dacwada dhegaysigu ka dhacday nooca tayada adeegyada la bixinayo. Ma jiro boonooyin ama labanlaabayaal la deegsan karo si loo xisaabiyo kharashka loo siiyay abaalmarinta.

Kharashka qareenka looma bixinayo iyo kharashaadka la xidhiidhana lama magdhabayo wax dacwad ama dacwad oogis sida ay dhigayso Qaybta B ee IDEA adeegyada la qabtay markaad qoraal ku soo jeediso inaad adigu bixinayso haddii:

1. Soo jeedintan la samaynayo gudaha wakhtiga uu amray sharciga 68 ee Hanaanka shuruucda Madaniga ah ee Federaaliga ama, xaalada hanaanka dhageysiga xaqsoorka ama dib u eegida heer gobol, wakhti kasta oo ka badan 10 maalmood ka hor intaanay dacwadu bilaabmin;
2. Soo jeedinta lagu aqbalin 10 maalmood; Iyo,
3. Maxkamada ama ALJ ay hesho in caawimada kama dambaysta aad heshay aanu kaaga cuntamin soo jeedinta iska bixinta kharashka.

Ka sakow xayiraadahan, maxkamadu waxay siin kartaa kharashka qareenka iyo kharashaadka la xidhiidha adiga haddii aad guulaysato oo si wax ku oola aad ugu cudur daartay diidmada soo jeedinta bixinta lacagta.

Kharashka qareenka la siinayo laga yaabaa inaan la bixin waxa la xidhiidha kulanka kooxda IEP ilaa kulanka loo qabto dacwad maamul ama ficil maxkamadeed mooyee.

Kulanka xalka loo baahanyahay hanaanka dhageysiga xaqsoorka loogama fekero kulan la isugu yeedhay iyadoo ay keentay dacwad maamuleed ama talaabo maxkamadeed, sidoo kalena loogama fekero dhagaysi maamuleed ama talaabo maxkamadeed marka la eego ujeedooyinka bixinta kharashka qareenada.

Maxkamadu way yarayn kartaa, sidii wax ku habboon yihiin, xaddiga kharashka qareenada lagu bixinayo sida ay dhigayso Qaybta B ee IDEA, haddii ay maxkamadu ogaato in:

1. Adiga, ama qareenkaagu intii lagu jiray dacwada, si aan macquul ahayn u daahiseen xalka kama dambaysta ah ee khilaafka;
2. Xaddiga kharashka qareenka ee haddii kale la ogolyahay in la siiyo si aan macquul ahayn uga badan yahay heerka saacadiiba ah ee ka jira bulshada adeegyada la midka ah ee ay qabtaan qareenada ay yihiin isku xirfadda, sumacada, iyo khibrada;
3. Wakhtiga lagu qaatay iyo adeega sharci ee la bixiyay waxay ahaayeen xad dhaaf marka loo eego sida ay tahay dacwadu; ama,
4. Qareenka wakiilka kaa ah kuma siin degmada xogtii habboonayd ogaysiiska codsiga hanaanka xaqsoorka sida lagu faahfaahiyay hoosta cinwaanka *Codsiga Hanaanka Dhageysiga Xaqsoorka*.

Si kastaba ha ahaatee, maxkamadu ma yaraynayso kharashka haddii maxkamadu ay hesho in gobolka ama dugsiga degmadu si aan macquul ahayn u daahiyay qaraarka dacwada ee

u dambeeya ama uu jiray xadgudub hoos imanaya qodobada habka dhowrida ee Qaybta B ee IDEA.

Hanaanka Edaabeed ee Ardayda Ku Haboon Waxbarashada Khaaska ah

Waxa jira dhowritaan waxbarashada khaaska ah oo la siinayo ilmahaaga marka isaga ama iyada uu yahay qof la edbinayo. Dhowritaanada waxa ay yihiin ku dheeraad ah hanaanada edaabta quseeya dhamaan ardayda. Dhowritaanadu waxa sidoo kale ay quseeyaan ardayda aan laga helin inay ku habboon yihiin waxbarashada khaaska ah haddii ay degmadu ogaan lahayd in ardaygu uu xaq u lahaan lahaa.

Masuuliyada Shaqaalaha Dugsiga
34 CFR §300.530; WAC 392-172A-05145

Go'aanka Kiis-Calaa-Kiis

Shaqaalaha dugsigu waxaa laga yaabaa in ay uga fekeraan duruufaha gaarka ah qaab ku salaysan kiis-calaa-kiis, marka la go'aaminayo haddii bedelka meelaynta, la sameeyay ee waafaqsan shuruudaha soo socda ee la xidhiidha edaabta, uu ku habboonyahay ilmahaaga kaas oo ku xadgudba xeerka dugsiga ee dhaqanka ardayga.

Guud

Ilaa xadka ay kaga qaadaan talaabada ardayda aan naafada ahayn, shaqaalaha dugsiga laga yaabaa in ay, in aan ka badnayn **10 maalmood oo dugsi** oo isku xiga, ay ka saaraan ilmahaaga meesha uu ku jiro geeyaana meel ku habboon oo waxbarasho ku meel gaadha oo kale, meel kale, ama ay ka hakiyaan ilmahaaga, marka isaga ama iyadu ku xadgudbo xeerka dhaqanka ardayga. Shaqaalaha dugsigu waxa laga yaabaa in ay ku soo rogaan ka saaritaan dheeraada ilmahaaga oo aan ka badnayn **10 maalmood oo dugsi** oo isku xiga isla sanad dugsiyeedkaa dhacdooyinka dhaqan xumo oo kala gaar ah; ilaa inta ka saaritaankaasi aanu ka dhignayn bedelaada meelaynta (ka eeg qeexitaanka hoose *Bedelka Meelaynta ay Sabab u tahay Ku Saarid Edaab Darteed*).

Marka ilmahaaga laga saaray meeshiisa ama meeesheeda hadda mudo **10 maalmood oo dugsi** isla sanad dusgiyeed, degmadu waa in ay, inta lagu jiro maalmaha xiga ee ka saritaanka sanad dugsiyeedkaas, adeegyo siisaa ilaa xadka loo baahanyahay hoosta cinwaan hoosaadka *Adeegyada.*

Masuuliyad Dheeraada

Haddii dhaqanka ku xadgudbay xeerka dhaqanka ardayga aanu cadayn u ahayn naafanimada ilmahaaga (ka eeg hoos *Cadaynta Go'aaminta*) oo bedelka meelaynta edaabeed ay dhaafto **10 maalmood** oo dugsi oo isku xiga, shaqaalaha dugsigu waxay u dabaqi karaan hanaanada edaabta ilmahaaga hab isku mida iyo muda isku mida sida ay ku ahaan lahayd ardayda aan naafada ahayn, laga reebo in dugsigu uu siiyo adeegyo ilmahaaga sida lagu faahfaahiyay hoosta *Adeegyada*. Kooxda IEP ee ilmahaaga ayaa go'aamiya meesha kale ee waxbarashada ku meel gaadhka ah ee adeegyada ilmahaaga xaaladan.

Adeegyada

Adeegyada la siinaayo ilmahaaga, marka isaga ama iyada laga saaray meesheedii ama meeshiisii, waxa lagu siin karaa goob waxbarasho oo kale oo ku meel gaadha.

Degmadu uma baahna in ay siiso ilmahaaga adeegyo haddii isaga ama iyada laga saaray meeshiisa ama meesheeda hadda **10 maalmood ama ka yar** sanad dugsiyeedkaa, ilaa ay siiso adeegyo ardayda aan naafada ahayn kuwaas oo si la mida looga saaray.

Haddii ilmahaaga laga saaray meeshiisa ama meesheeda hadda in ka badan **10 maalmood oo dugsi** waa in uu ilmahaagu:

1. Sii wadaa helida adeegyo waxbarasho, si awood loogu siiyo ilmahaaga in uu sii wato ka qaybgalka manhajka guud ee waxbarashada, in kastoo ay tahay meel kale, oo ku horumaro gaadhida ujeedooyinka ay dhigeen IEP-eeda ama -tiisa; **iyo,**
2. Haddii dhaqanka ilmahaagu yahay caddaynta naafadeeda/diisa, isaga ama iyadu waa in uu helaa, si ku habboon, qiimaynta dhaqanka quseeya, iyo adeegyada wax-ka-qabadka iyo hagaajinta dhaqanka, kuwaas oo loogu talo galay xadgudubka dhaqanka sidaas darteed mar dambe ma dhacayso.

Ka dib markii ilmahaaga lagaa saaray meeshiisa meesheeda hadda **10 maalmood oo dugsi** isla sanad dugsiyeedkaas, oo **haddii** ka saarida hadda ay tahay **10 maalmood** oo dugsi oo isku xigta ama ka yar, **oo** haddii ka saarida aan la go'aamin in uu jiro bedel meelaynta ahi (ka eeg qeexitaanka hoos), **ka dib** shaqaalaha dugsigu, iyagoo la tashanaya ugu yaraan mid ka mida macalimiinta ilmahaaga, waxay go'aan ka gaadhi doonaan ilaa inta adeegyada loo baahanyahay is ay awood ugu siiyaan ilmahaaga in ay in uu sii wato ka qaybgalka manhajka waxbarashada guud, inkastoo meel kale ay tahay, iyo horumarka in la gaadho ujeedooyinka lagu dejiyay IEP ilmahaaga.

Haddii ka saaridu ay tahay bedel meelaynta (eeg qeexida hoose), ilmahaagu kooxdiisa IEP ayaa go'aamisa adeegyada ku habboon si ay awood ugu siiso ilmahaaga in uu sii wato in

uu ka qaybgalo manhajka guud ee waxbarashada, inkastoo meel kale ay tahay, iyo si uu ugu horumaro si loo gaadho u jeedooyinka lagu dejiyay IEP-giisa ama -eeda.

Bedelka Meelaynta ay Sababto Ka saarid Edaabeed
34 CFR §300.536; WAC 392-172A-05146 – WAC 392-172A-05155

Ka saarida ilmahaaga ee meelaynta waxbarasho ee hadda waa **Bedelid Meelayneed** haddii:

1. Ka saaridu ay ka badantahay 10 maalmood oo dugsi oo isku xigta; **ama,**
2. Ilmahaaga lagu xukumay ka saaritaano isku xig xigay kuwaas oo abuuray nidaam maxaa yeelay:
   a. Ka saaritaanada isku xigaa waxay wadar ahaan ka badanyihiin 10 maalmood oo dugsi gudaha sanad dugsiyeedka;
   b. Dhaqanka ilmahaagu waxa uu si wayn ula mid yahay dhaqankeeda ama kiisa dhacdooyinkii hore kuwaas oo keenay ka saaritaanada isku xig xiga; **iyo,**
   c. Waxaa jira asbaabo dheeraada oo laga fekeray sida dhererka ka saarid walba, wadarta guud ee ilmahaaga laga saaray, iyo isku dhawaanshaha ka saarida midba ta kale.

Waxay go'aamisay degmada dugsigu haddii noocyada ka saaritaanku ay keenayaan bedel meelayneed qaab kiis-calaa-kiis ah, iyo haddii aad ku loolanto adigu, in hoos dib loogu eego iyadoo loo marayo hanaanka xaqsoorka iyo dacwadaha caddaaladeed.

Ogaysiin

Taariikhda degmadu go'aamiso saaritaanka kaas oo ah bedelka meelaynta ilmahaaga ay sababtu tahay ku xadgudubka xeerka ardayda, waa in ay kugu soo wargelisaa go'aankaa oo ay ku siisaa ogaysiiska dhowritaanka caadiga ah.

Go'aanka Caddaynta

10 maalmood gudahood oo ah wax go'aana oo bedel meelayneed ah (eeg *Bedelka Meelaynta ay Sabab u tahay Ku Saarid Edaab Darteed*) ee ilmahaaga maxaa yeelay waxa uu ku xadgudbay xeerka dhaqanka ardayga, degmada, iyo xubnaha la xidhiidha ee kooxda IEP, ee aad go'aamiseen adiga iyo degmadu, waa in ay dib u eegaan dhamaan xogta la xidhiidha ee faylka ilmahaaga, oo ay ku jirto IEP-iisa ama -eeda, wax baadhitaan macalin, iyo wax xog ah oo kale oo la xidhiidha oo aad bixisay si go'aan looga gaadho:

1. Haddii dhaqanka la is waydiinayo uu keenay, ama uu ku lahaa xidhiidh toos ah oo muuqda, naafanimada ilmahaaga; **ama,**
2. Haddii dhaqanka la iswaydiinayaa ay ahayd natiijada tooska ah ee ku guuldaraysashada degmada in ay fuliso IEP-ga ilmahaaga.

Haddii xubnaha la xidhiidha kooxda IEP ilmahaaga, ood ku jirto, ay go'aamiyaan xaaladahan midkood in la buuxiyay, dhaqanka waa in la go'aamiyaa in uu yahay cadayn naafanimada ilmahaaga.

Haddii kooxda lagu faahfaahiyay kor ay go'aamiso in dhaqanka la iswaydiinayaa uu ahaa natiijada tooska ah ee ku guuldaraysashada degmada in ay fuliso IEP, degmadu waa in ay isla markaaba qaadaa talaabo si ay wax uga qabato mushkiladaha.

Go'aan ah in dhaqanku uu ahaa Cadaynta Naafanimada Ardayga

Marka kooxdan, aad ku jirto uu go'aamiyo, in dhaqanku calaamad u ahaa naafanimada ilmahaaga, Kooxda IEP waa in ay mid uun:

1. Samaysaa qiimayn dhaqan oo shaqeed, ilaa ay degmadu fulisay qiimaynta dhaqan ee shaqayneed mooyee kahor intii dhaqanka keenay beddelka meelayntu aanu dhicin, oo ay fuliso qorshaha wax-ka-qabadka dhaqanka ee ilmahaaga; **ama,**
2. Haddii qorshaha wax-ka-qabadka dhaqanka la soosaaray, dib u eegto qorshaha wax-ka-qabadka dhaqanka, oo dib u hagaajiso, ilaa inta lama huraanka ah, si ay wax uga qabato dhaqanka ilmahaaga.

Laga reebo sida hoos lagu faahfaahiyay hoosta cinwaanka qaybta *Special Circumstances*, degmadu waa in ay ku soo celisaa ilmahaaga meelaynta iyada ama isaga laga saaray, ilaa adiga iyo degmada aad isku raacdaan in aad bedeshaan meelaynta mooyee oo ay qayb ah hagaajinta qorshaha wax-ka-qabadka dhaqanka.

Duruufo Gaara

Shaqaalaha dugsigu waxay u saari karaan ilmahaaga meel kale oo waxbarasho oo ku meel gaadha (ay go'aansatay kooxda IEP ee ardayga), Iyada oon loo eegayn haddii uu ahaa ama aanu ahayn dhaqanka ilmahaagu cadaynta naafadiisa/eeda, ilaa 45 maalmood oo dugsi, haddii iyada ma isagu:

1. U soo qaataa hub (eeg qeexida xaga hoose) dugsiga ama hub ku haystaa dugsiga, dhismaha dugsiga, ama ku shaqaynta dugsiga sida uu dhigayo xeerka degmada;
2. Ula kac ahaan u haystaa ama isticmaalaa maandooriye aan sharci ahayn (eeg qeexida xaga hoose), ama iibiyaa ama raadiyaa walax mamnuuc ah, (eeg qeexida hoos), marka uu dugsiga joogo, dhismayaasha dugsiga, ama ku shaqaynta dugsiga sida uu dhigayo xeerka degmada; **ama,**
3. U gaystay dhaawac halis ah (eeg qeexida hoose) qof kale markuu dugsiga joogay, dhismaha dugsiga, ama ku shaqaynta dugsiga sida uu dhigayo xeerka degmada.

Qeexdimaha

- *Walax mamnuuc ah* waxaa loo jeedaa maandooriyaha ama walax kale oo lagu cadeeyay hoosta qoraalada1 II, III, IV, or V gudaha qaybta 202(c) Xeerka Walxaha Mamnuuca ah (21 U.S.C. 812(c)).
- *Maandooriye* micnaheedu waa walax mamnuuca; laakiin kuma jirto walxaha manuuca ah ee sharci ahaan loo haysto ama lagaga war hayo xirfad yaqaan caafimaadka ah oo

ruqsad haysta ama taasi oo si sharci ah loogu haysto ama isticmaalayo Xeerkaas ama xeer kale oo hoos yimaada sharciga Federaaliga.

- *Dhaawac halis ah oo jidheed* micnaheedu waa dhaawac jidh oo ku lug leh: halis muuqata oo dhimasho; xanuun xooga oo jidka ah; fool xumo dheeraatay oo muuqata; khasaare mudo dheeraaday ama dhaawaca ka gaadhsiinta jidhka ah, ama xubin oo naafo keentay.
- *Hubka* micnahiisu waa hub, qalab, aalad, alaab, ama walax, dhaqaaq samaynaysa ama aan samaynayn, taas oo loo adeegsado, ama si diyaara awood ugu leh, in ay dhimasho keento ama dhaawac jidhka ah oo halis ah, erey bixintan kuma jirto midida jeebka leh af ka yar laba iyo badh hiish dhererkeedu.

Go'aanka Meesha
34 CFR § 300.531; WAC 392-172A-05145; WAC 392-172A-05149

Kooxda IEP waa in ay go'aamisaa meesha kale ee waxbarashada ku meel gaadh ka ah ee saaritaanada kuwaas oo ah **Bedelaado Meelayneed**, iyo ka saaritaanada ku jira cinwaanka *Additional Authority* iyo *Special Circumstances*, xaga sare.

Rafcaanka Go'aanka Meelaynta iyo Go'aaminta Cadaynta (Hanaanka Dhageysiga Xaqsoorka ee Edaabta)
34 CFR § 300.532; WAC 392-172A-05160

Waxaad soo gudbin kartaa codsi hanaanka dhageysiga xaqsoorka haddii aad khilaafto:

1. Wax go'aana oo ku saabsan meelaynta lagu sameeyay hoosta qodobada edaabta; **ama,**
2. Go'aanka cadaynta kor lagu faahfaahiyay.

Degmadu waxay soo gudbin kartaa codsi hanaanka dhageysiga xaqsoorka haddii ay rumaysantay in ku sii haynta meelaynta ee ilmahaaga in si wayn ay suuragal u tahay in ay dhaawac ku keento ilmahaaga ama kuwa kale.

Eeg qaybta **Due Process Hearing Procedures** wixii xog ee dheeraada ee soo gudbinta codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka.

Masuuliyada Xaakimka Sharci Maamuleed (ALJ)

ALJ waa in ay fulisaa hanaanka dhageysiga xaqsoorka oo go'aan gaadhaa. ALJ waxa laga yaabaa in ay:

1. Ku celiso ilmahaaga meelaynta taas oo isaga ama iyada laga saaray haddii ALJ go'aansato in ka saaridu ay ahayd xadgudub shuruudaha lagu faahfaahiyay hoosta cinwaanka *Masuuliyada Shaqaalaha Dugsiga,* ama in uu dhaqanka ilmahaagu ahaa cadaynta naafanimadiisa; **ama,**
2. Dalbato bedelaad meelaynta ah ee ilmahaaga meel kale oo ku meel gaadha oo ku habboon, in aan ka badnayn 45 maalmood dugsi haddii ALJ ay go'aansato in ku sii haynta ilmahaaga

meeshiisa hadda si aada ay suuragal u tahay in ay ku keento dhaawac ilmahaaga ama kuwa kale.

Habka dhageysiga waa lagu celin karaa, haddii ay degmadu aaminsantahay in ku celinta ilmahaaga meelayntiisii hore ay si wayn u suuragal tahay in ay ku keento dhaawaac ilmahaaga ama kuwa kale.

Markastoo adiga ama degmadu codsato hanaanka dhageysiga xaqsoorka, codsigu waa in uu buuxiyaa shuruudaha lagu faahfaahiyay hoosta cinwaanka *Due Process Hearing Request Procedures and Due Process Hearing* laga reebo sida soo socota:

1. Hanaanka dhageysiga xaqsoorka waa la dedejiyaa, waana in ay dhacdaa **20** maalmood oo dugsi gudahood ee taariikhda dhegaysiga la codsaday. ALJ waa in ay soo saarta go'aam **10** maalmood oo dugsi gudahood ka dib dhegaysiga.
2. Ilaa adiga iyo degmadu aad aqbashaan qoraal ahaan inaad dhaaftaan kulanka, ama aad isku waafaqdaan in aad dhexdhexaadin adeegsataan, xalku kulanku waa in uu dhacaa **todoba** maalmood gudahood taariikhda aad u soo gudbisay codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka OSPI iyo degmada. Way sii socon kartaa dacwadu ilaa arinka lugu xaliyay raali ahaanshaha labada kooxoodba **15** maalmood gudahood helitaanka codsiga dacwad hanaanka dhageysiga xaqsoorka.
3. OSPI waxay abuurtay jadwal **2 maalmood** oo maalmaha shaqada ah keenista cadaynta marka adiga ama degmadu ay soo gudbiso codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka ee la dedajiyay (ee edaabeed).

Adiga ama dugsiga degmada waxay bilaabi karaan dacwad madaniya, oo ka dhan ah go'aanka hanaanka dhageysiga xaqsoorka la dedajiyey si la mida siday uga hor yimaadeen hanaanka dhageysiga xaqsoorka ee waxbarashada khaaska ah ee aan edaabta la xidhiidhin (eeg *Rafcaanada*, Xaga sare).

Meelaynta Inta Lagu Guda Jiro Hanaanka Dhageysiga Xaqsoorka ee la Dedajiyey
34 CFR §300.533; WAC 392-172A-05165

Marka adiga ama degmadaadu ay soo gudbiso codsiga hanaanka dhageysiga xaqsoorka oo la xidhiidha arimaha edaabta, ilaa adiga iyo degmadu isku raacaan habayn kale mooyee, ilmahaagu waa in uu joogaa meel kaloo waxbarasho oo sugo go'aanka sarkaalka dhageysiga, ama ilaa inta muda ka saarida uu wakhtigeedu dhacayo, lagu faahfaahiyay hoosta cinwaanka *Masuuliyada Shaqaalaha Dugsiga*, ku kastoo ugu hor dhaca.

Ilaalinta Ardayda aan Weli ku Habboonayn Waxbarashada khaaska ah iyo Adeegyada la Xidhiidha
34 CFR §300.534; WAC 392-172A-05170

Guud

Haddii ilmahaaga aan loo go'aamin xaq u yeelashada waxbarashada khaaska ah iyo adeega la xidhiidha, oo uu ku xadgudbo xeerka dhaqanka ardayga, waxaad xaqiijin kartaa hanaanka ilaalineed ee ilmahaaga haddii la go'aamiyo in ay degmadu ay qabtay aqoonta in ilmahaaga ay ahayd in la qiimeeyo oo loo go'aamiyo in uu xaq u leeyahay waxbarashada khaaska ah ka hor inta dhaqanka keenay falka edaabeed aanu dhicin.

Asaaska Aqoonta Xaaladaha Edaabeed

Degmadu waa inay u muuqatay in ay qabto aqoonta in ilmahaagu uu xaq u leeyahay waxbarashada khaaska ah haddii, ka hor intaanu dhaqanka keenay falka edaabtu dhicin:

1. Waxaad ugu ku muujisay qoraal in ilmahaagu uu u baahanyahay waxbarasho khaas ah iyo adeegyada la xidhiidha shaqaale horjoogayneed ama maamuleed oo dugsiga degmada ah, ama macalinka ilmahaaga;
2. Waxaad codsatay qiimayn la xidhiidha xaq u lahaanshaha waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha sida ay dhigayso Qaybta B ee IDEA; **ama**,
3. Macalinka ilmahaaga, ama shaqaale kale oo degmada ah, waxa uu ka muujiyay walaacyo ku saabsan nooca dhaqanka uu toos ugu muujiyay ilmahaagu maamulaha waxbarashada khaaska ah ee degmada, ama shaqaale kale oo horjoogayneed oo degmada ah.

Ka reeban

Degmadu umay muuqateen in ay aqoontaa qabto haddii:

1. Aanad ogolaan qiimaynta ilmahaaga ama aad diiday adeega waxbarashada khaaska ah; **ama**,
2. Ilmahaaga waxaa lagu qiimeeyay oo go'aan lagu gaadhay in aanu xaq u lahayn adeegyada waxbarashada khaaska ah.

Xaaladaha ku Habboon Haddii Aanay Jirin Aasaas Aqooneed

Haddii ay degmadu aqoon ka haysan in ilmahaagu uu xaq u leeyahay waxbarashada khaaska, ka hor inta aan laga qaadin ilmahaaga talaabooyin edaabeed, si lagu faahfaahiyay sare hoosta cinwaan hoosaadka *Aasaaska Aqoonta Xaaladaha Edaabeed* iyo *Ka reeban*, ilmahaaga waxaa laga qaadi doonaa talaabooyinka edaabeed ee loo adeegsado ardayda aan naafada ahayn kuwaas oo ku kacay noocyo dhaqano la mida.

Si kastaba ha ahaatee, haddii adiga ama degmadaagu ay codsato qiimaynta ilmahaaga inta lagu jiro mudada taas oo isaga ama iyada lagu qaadayo talaabooyin edaabeed, qiimaynta waa in loo fuliyaa qaab la dedejiyay.

Ilaa qiimaynta la dhameeyo, ilmahaagu waxa uu ku jirayaa meelaynta waxbarasho oo ay go'aamiyeen masuuliyiinta dugsigu, kuwaas oo ay ku jiri karaan ka joojin ama ka eryid aan lahayn adeeg waxbarasho.

Haddii ilmaha loo go'aamiyay in uu xaq u leeyahay adeegyada waxbarashada khaaska ah, iyadoo talada lagu darsanayo xogta laga helay qiimaynta ay bixisay degmadu, iyo xogta aad bixisay, degmadu waa in ay siisaa waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha ilmahaaga oo ay raacaan baahiyaha edaabeed ee lagu faahfaahiyay kor.

U Gudbinta iyo Ficilka Masuuliyiinta Sharci Fulinta iyo Caddaaladda 34 CFR §300.535; WAC 392-172A-05175

Qaybta B ee IDEA kama:

1. Mamnuucdo degmada dugsiga in ay uga warbixiyaan dembi uu galay ilmahaagu kaas oo xaq u leh waxbarashada khaaska ah masuuliyiinta ku habboon; **ama,**
2. Kama hor joogsato sharci fulinta gobolka iyo masuuliyiinta maxkamadeed in ay gutaan waajibaadkooda ee qusaysa ku fulin sharciyada federaaliga iyo kuwa gobolka dembiyada uu galay ilmahaagu.

Gudbinta Diiwaanka

Haddii degmadu ay ka warbixiso dembi uu galay ilmahaagu, degmadu:

1. Waa in ay hubisaa in nuqulada waxbarashada khaaska ah iyo diiwaanada edaabeed ay u soo gudbiyaan ka fiirsasho ahaan masuuliyiinta kuwaas oo ay wakaaladu uga warbixiso dembiga; **iyo,**
2. Laga yaabaa in ay dirto nuqulo ah diiwaanka edaabeed iyo waxbarashada khaaska ah ee ilmahaaga keliya ilaa inta ay ogolyihiin FERPA.

Shuruudaha Meelaynta Hal dhinac ah ee Waalidka Ardayda Dugsiyada Gaarka ah ee Kharashka Dadwaynaha Marka FAPE uu Meesha ku Jiro CFR § 300.148; WAC 392-172A-04115

Haddii aad rumaysantahay in dugsigaaga degmadu aanu siin karin FAPE ilmahaaga oo aad jeceshahay in aad ka diiwaan geliso dugsi gaar ah iyadoo aqbalin degmadu, waxaa jira talaabooyin gaar ah oo aad raacayso si aad uga codsato degmada magdhowga lacagta kaaga lumaysa dusgisga gaarka ah.

Magdhowga Meelaynta Dugsiga Gaarka ah

Haddii ilmahaagu hore uga helay dugsiga degmada waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha, oo aad doorato in aad ka diiwaan geliso ilmahaaga dugsiga gaarka ah ee barbaarinta, dugsiga hoose, ama dugsiga sare adoon ogolaansho iyo gudbin ka haysan degmada, maxkamad ama ALJ waxa laga yaabaa in ay uga baahato degmada in ay kuu magdhowdo kharashka diiwaan gelintaa haddii maxkamada ama ALJ ay hesho in dugsiga degmadu aanu u diyaarin FAPE ilmahaaga si ku habboon ka hor diiwaan gelintaa iyo in meelaynta gaarka ahi ay ku habboontahay. Maxkamada ama ALJ waxay ka heli

kartaa meelayntaada mid ku habboon, xataa haddii meelayntu aanay ku haboonayn heerka gobolka ee la xidhiidha waxbarashada ay bixiso degmadu.

Xadidida Magdhowga

Qiimaha magdhowga sida lagu faahfaahiyay tuduca sare waa la yarayn karaa ama la diidi karaa:

1. Haddii: (a) Kulankii ugu dambeeyey ee IEP ee aad ka qaybgashay ka hor intaan ilmahaaga dugsiga dadwaynaha, aanad wargelin kooxda IEP in aad diidaysay meelaynta ay soo jeediyeen degmadu in ay siiyaan FAPE ilmahaaga, ooy ku jirto sheegida walaacaaga iyo ujeedadaada in aad ku diiwaan geliso ilmahaaga dugsi gaar ah kharashka dadwaynaha; ama (b) ugu yaraan 10 maalmood oo shaqo (oo ay ku jirto wax fasaxa oo soo dhex gala maalmaha shaqo) ka hor inta aan laga saarin ilmahaaga dugsiga dadwaynaha, aanad siin ogaysiis qoraal ah degmada xogtaas;
2. Haddii, ka hor ka saarida ilmahaaga dugsiga dadwaynaha, degmadu ay ku siisay ogaysiis qoran, oo ujeedadeedu tahay in ay qiimeeyaan ilmahaaga (ooy ku jirto warbixin ujeedada qiimaynta taas oo haboonayd oo macquul ahayd), laakiin ilmahaaga umaad soo diyaarin qiimaynta; **ama,**
3. Natiijada maxkamada in ay dacwadahaagu ay ahaayeen kuwa aan macquul ahayn.

Si kastaba ha ahaatee, qiimaha magdhowga:

1. Waa in aan loo yarayn ama loo diidin bixin waayidda ogaysiis haddii: (a) uu dugsiga kaa mamnuucay bixinta ogaysiiska; (b) aanad ka helin ogaysiis masuuliyadaada in aad bixiso ogaysiiska lagu faahfaahiyay kor; ama (c) u hogaansanaanta shuruudaha kore ay u keeni lahaayeen dhaawac ilmahaaga; **iyo,**
2. Laga yaabaa, sida ay go'aansato maxkamada ama ALJ, aan loo yarayn ama loo diidin bixin la'aantaada ogaysiis loo baahnaa haddii: (a) aanad aqoon lahayn ama aanad qori karin af Ingiriisiga; ama (b) u hogaansanaan shuruudaha kore ay ku keeni lahayd dhaawac dareen oo halis ah ilmahaaga.

Ilaha

Haddii aad su'aalo hayso ku saabsan hanaanka dhowrida, fadlan la xidhiidh dugsiga degmadaada ama OSPI wixii xog dheeraad ah:

OSPI
P.O Box 47200
Olympia, WA 98504
360-725-6075
speced@k12.wa.us
OSPI - Bogga webka Waxbarashada Khaaska ah
OSPI -Waxbarashada Khaaska- Bogga webka Qoysaska

Ururada dadwaynuhu maalgeliyaan ee hoose waxay ku siin karaan xog dheeraada oo ku saabsan adeegyada waxbarashada khaaska ah ee Gobolka Washington:

Partnerships for Action Voices for Empowerment (PAVE)
6316 So. 12th St.
Tacoma, WA 98465
(800) 5-PARENT (v/tty)
Iimayl: pave@wapave.org
Websaytka: Partnerships for Action Voices for Empowerment (PAVE)

Marka laga reebo meelaha la qorey, shaqadan ee(Office of Superintendent of Public Instruction) Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha waxa liisanka siiyey Creative Commons Attribution License.

Fadlan hubi in ogolaanshada aad heshay si aad u isticmaasho daabacaadan (sawirada, shaxanada, qoraalada, iwm.) ee aaney abuurin shaqaalaha OSPI, loo-damaaanad qaadayaasha, ama qandaraaslayaasha. Ogolaanshahan waa in loogu muujiyaa sida qoraan lahaansho habka ay qeexday haystaha sharciga daabacaaddu. Waa in la cadeeyaa in shaygu uu yahay mid kamid ah "marka laga reebo meesha haddii kale ee la qorey" waxyaalaha ka reeban liisanka furan ee OSPI .

Xog dheeraad ah, fadlan booqo Hagaha Daabacaadda iyo Liisan Siinta Macaamil ee (OSPI Interactive Copyright and Licensing Guide).

Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadwaynaha waxay ku bixisaa adeegsi loo simanyahay dhammaan barnaamijyada iyo adeegyada iyada oon ku takoorayn cidna jinsi, isir, caqiido, diin, midab, asalka wadanka qofku ka yimi, da', askartii hore ee la fasaxay ama xaaladda ciidan, doorashada jinsiga oo uu ku jiro muujinta ama aqoonsiga jinsigu, jiritaanka naafanimada dareenwad, maskaxeed ama jidheed, ama adeegsiga ey hage ah oo tababaran ama xayawaanka adeega ee qof naafo ah. Su'aalaha iyo cabashooyinka takoorka la tuhunsanyahay waa in lagu soo hagaajiyaa Equity and Civil Rights Director at 360-725-6162 ama P.O. Box 47200 Olympia, WA 98504-7200.

Kusoo dejiso alaabtan PDF ahaan OSPI - Waxbarashada Khaaska ah - Bogga webka Habka Dhowrida. Xogtan waxaa lagu heli karaa qaab kale markii la codsado. La xidhiidh Xarunta Khayraadka 888-595-3276, TTY 360-664-3631. Fadlan gudbi lambarka dokumentigan si adeeg degdega ah loo qabto: 19-0008.

Chris Reykdal • Kormeeraha Guud ee Gobolka
Office of Superintendent of Public Instruction
Old Capitol Building • P.O. Box 47200
Olympia, WA 98504-7200